**FAAFINTA RASMIGA**

**الجريدة الرسمية**

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

## لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 13-aad. Garowe 03 August, 2011** **Lam.8**

**Faafinta bil walba soo baxda** **جريدة الشهرية**

***<u>Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland</u>***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**<u>Qaybta Koowaad</u>**

**<u>Sharci</u>**

**<u>Qaybta labaad</u>**

**<u>Xeer</u>**

**<u>Waxba ma leh</u>**

**<u>Qeybta Saddexaad</u>**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

***Sharci Lr 3. ee 05/08/2011, kuna saabsan Sharciga Horumarinta Siyaasadda Dhalinyarada Puntland.***

20

**DOWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

ولاية بونت لاند الصومالية

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Sharci Lr. 3 ee August 03, 2011, kuna saabsan Sharciga Horumarinta Siyaasadda dhalinyarada Puntland.**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad faqradiisa 6-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/69/2011 ee 18/07/2011;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda sharcigan Siyaasadda horumarintu u leeyahay dhalinyaradda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen sharciga siyaasadda Horumarinta dhalinyarada Puntland.

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Qaryaqaanka Guud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka xeerkani wuxuu noqonayaaw maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay, kaas oo laga baahinayo idaacadaha, baahinta ka dib ayaa xeerkani sharci noqonayaa, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhawro kuna dhaqmo xeerkan.

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

**DAWLADDA PUNTLAND EE SOMALIYA** | **PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**GOLAHA WAKIILLADA** | **HOUSE OF REPRESENTATIVES**

**Xafiiska Guddoomiyaha** | **Office of the Speaker**

---

*Ref:*- XGGW/DPL/ 69 /2011 Garoowe, Isniin Date:- 18/07/2011

Ku:- Madaxweynaha DPL Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Siyaasadda Horumarinta Dhallinyarada Puntland

Guddoomiyaha Golaha Wakiiladdu:-

MARKUU ARKAY;- Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad.

MARKUU ARKAY:- Soo gudbinta Madaxeynaha Xeer Lr, 29 ee 04 July,2011 kuna saabsan Siyaasadda Horumarinta Dhallinyarada

MARKUU TIXGELIYEYEY:- Baahida loo qabo in Dhallinyarada Puntland yeelato Siyaasadda Horumarineed.

MARKUU DHEGAYSTAY:- Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada.

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixinta Siyaasadda Horumarinta Dhallinyarada Puntland

Allaa Mahad Leh

Cabdirashiid Maxamed Xirsi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada / Speaker of the House of Representatives / PUNTLAND STATE

## Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhalinyaraddda iyo Ciyaaraha

# SIYAASADDA HORUMARINTA DHALLINYARADA

# DAWLADDA PUNTLAND ee SOOMAALIYA

**Waxaa diyaariyey:**
**Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha**

**Juun. 2011**

# Tusmada


**Qaddimis** — **Bogga**

**Ereyo la soo gaabiyey** 3

**Nuxur Kooban** 4

**Cutubka 1aad: Hordhac**

**1.1** Qeexid Dhallinyaro 10

**Cutubka 2aad: Gogoldhigga Siyaasadda** 11
**2.1** Tixgalino taariikh ah 11
**2.2** Caqabadaha Harumarinta Puntland 12
**2.3** Xog-Muujin Dhalinyaro 13
**2.4** Xaqiiqda laga Duulay 13

**Cutubka 3aad: Himilo, Mabaadi'da iyo Goolalka** 17
**3.1** Himilo 17
**3.2** Mabaadii'da Laga Duulayo 17
**3.3** goolka Siyaasadda Horumarinta Dhallinyarada 19

**Cutubka 4aad: Meelaha Mudnaanta Itiraatijiyadeed la Siinayo** 20
**4.1** Barashada Xirfadaha iyo Tababarrada 20
**4.2** Kaqaybgalka Dhallinyarada iyo Horumarinta hoggaaminta 23
**4.3** Hub-ka dhigista, Aminga iyo Xoojinta Nabadgelyada 26
**4.4** Ilo-nololeed dhaxalgal ah iyo shaqaalaynta dhallinyarada 27
**4.5** Madadaalada, Ciyaaraha, Xarumo Dhallinyaro, Farshaxanka iyo Dhaqanka 30
**4.6** Hab-Nololeedyo Suubban 32
**4.7** Horumar Dhaxalgal ah iyo Deegaan haboon 35
**4.8** Jinsiga iyo Xaquuqul Aadanaha 37
**4.9** Barashada Wadaniyadda 39
**4.10** Socdaalka iyo Qurba-joogta 39
**4.11** Teknoolojiyada Wargudbinta, Isgaarsiinta iyo Isu-furraanta Caalamka 41

**Cutubka 5aad: Kooxaha ah Yoolka Mudnaanta kowaad** 43

**Cutubka 6aad: Fulinta Siyaasadda iyo Xiriiriinta Hawlaha** 44

**Cububka 7aad: Xaquuqaha iyo Waajibaadka Dhallinyarada** 46

**Gebagebo** 48

**Mahadnaq** 49

# Ereyo la soo gaabiyay (Abbreviations)

| | |
|---|---|
| AIDS | Acquired Immune Deficiency Syndrome |
| CRC | Convention on the Rights of the Child |
| CSO | Community Service Organisation |
| FGM | Female Genital Mutilation |
| FYDP | Five Year Development Plan |
| HIV | Human Immunodeficiency Virus |
| ICNYP | International Council on National Youth Policy |
| ICT | Information Communication Technology |
| IDP | Internally Displaced Person |
| ILO | International Labour Office |
| KABP | Knowledge, Attitudes, Behaviour and Practice |
| MDG's | Millennium Development Goals |
| MENA | Middle East and North Africa |
| MOE | Ministry of Education |
| MOWDAFA | Ministry of Women's Development & Family Affairs |
| MOLYAS | Ministry of Labor, Youth & Sports |
| NFE | Non Formal Education |
| NGO | Non Government Organisation |
| PAC | Puntland Aids Commission |
| PEPP | Puntland Education Policy Paper |
| PLWHA | People Living With HIV or Aids |
| PRG | Puntland Regional Government |
| RDP | Reconstruction and Development Plan for Somalia |
| STI/STD | Sexually Transmitted Infections / Sexually Transmitted Disease |
| TB | Tuberculosis |
| TVET | Technical & Vocational Education and Training |
| UNAIDS | Joint United Nations Programme on HIV/AIDS |
| UNDP | United Nations Development Programme |
| UNICEF | United Nations Children's Fund |
| NYEAP | National Youth Employment Action Plan |
| YEN | Youth Employment Network |

# Nuxur Kooban

Siyaasadda Horumarinta Danaha Dhallinyarada ee Dawladda Puntland waa tibaax muhiimad qaran leh. Waxaana loogu tala galay inay adeegsadaan dhammaan daneeyayaasha horumarinta dhallinyarada oo ay ka mid yihiin wasaaradaha dawladda, ururada bulshada rayidka ah, hay'adaha/shirkadaha gaarka loo leeyahay, hoggaamiyayaasha bulshada iyo si gaar ah dhallinyada rag iyo dumar si ay ugu iftiimiso: –

- Aragtida fog ee horumarinta dhallinyarada;
- Maabaadiida laga duulayo tibaaxdooda;
- Soo koobis baahiyaha, hammiga, higsashada mustaqbalka iyo wax soo biirinta dhallinyarada
- Helida Qaab-hawleed dhinacyo badan wajahaya;
- Dejinta istiraatijiyadaha mudnaanta leh iyo waxqabadyo;
- Nidaam lagu hagaajin karo xiriirinta iyo wada shaqaynta u dhexaysa hay'adaha ku lug leh hawlaha dhallinyarada;
- Tibaaxidda Xaquuqaha dhallinyarada iyo waajibaadka saran; iyo
- Nidaam lagu qiimeeyo laguna hubin karo horumarka laga gaarey dhallinyarada.

Siyaasadda Horumarinta Dhallinyarada Puntland waa maxsuulkii ka soo baxay labo sano oo dedaallo midaysan oo ay wada qabteen UNICEF, Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha Puntland, Ururada bulshada rayidka ah iyo tiro badan oo ka mid ururada dhallinyarada ee dalka. Waxaa intaa dheeraa, xog ururin fara badan iyo wada tashiyo ay ka qaybgaleen lixda gole oo heer gobol ahaa oo loogu talogalay inay in ka qaybgalaan dejinta iyo horumarinta siyaasadda dhallinyarada Puntland

<u>Lixda yool ee Siyaasadda Horumarinta Dhallinyarada Dalku higsaneyso waxay kala yihiin:–</u>

- In la sameeyo hannaan wax qabad oo dhinacyo badan leh, iskuna wada xiriirsan kuna wajahan horumarka dhallinyarada Puntland, gabdho iyo wiilalba;
- In la muujiyo dhinacyada mudnaanta koowaad la siinayo ee siyaasadda iyo barnaamijyada wax-qabadka
- In la xoojiyo qaab-dhismeedyada, xiriirinta, isku duwista iyo maaraynta istiraatijiyadaha ku wajahan horumarinta dhallinyarada.

- In la helo faham ballaaran, aqoonsi iyo dadaal dhab oo ku wajahan caqabadaha, danaha iyo wax soo biirinta dhallinyarada.
- In la kobciyo lana kordhiyo ka qaybgal firfircoon iyo doorka hoggaamineed ee dhallinyradu ku leeyihiin bulshada iyo tan qarankaba.
- In la dhiirigeliyo dareenka masuuliyadaha iyo xushmada ay dhallinyadu u hayaan mabaadi'da Islaamka, qiimaha qoysa, dhaqanka Soomalida iyo qaranimada.

Siyaasaddan waxa gundhig u ah oo hagaya mabaadiida soo socota:–

- Caqiidada Islaamka
- Midnimo qaran, waddaninimo iyo sharaf
- Xushmaynta Dhallinyarada iyo da'yarta
- U sinnaanta horumarka rag iyo dumarba
- Horumarin guud oo dhinacyo badan isugu dhafan
- Isku-xirnaansho
- Iskaashi iyo wax wada qabsi
- Dhawrista deegaanka iyo dhiirigelinta falal-dhaqameedyada habboon
- Dhisidda nabadda
- Xisaabtan iyo Hufnaan

Siyaasadda Horumarinta Dhallinyarada Dalka waxaa xuddun u ah kow iyo toban (11) baaq oo ah qaybaha istiraatijiyaddu mudnaanta kowaad la siinayso, qayb walibana waxay ka sii kooban tahay ujeeddooyin hoosaad istiraatiiji ah iyo waxqabadyada mudnaanta koowaad leh.

Qaybaha xuddunta ah waxa ka mid ah –

1. Barashada Xirfadaha iyo tababarrada
2. Horumarinta ka qaybgalka dhallinyarada iyo hoggaaminta
3. Hub ka dhigis, amniga iyo horumarinta nabadgelyada
4. Ilo-nololeedyo sii jira iyo shaqaalaynta dhallinyarada
5. Madadaalada, ciyaaraha, xarumo dhallinyaro,fanka iyo dhaqanka
6. Hab-Nololeedyo haboon oo caafimaad qaba
7. Horumar waaritaan leh iyo dhawrista deegaanka
8. Jinsiga iyo xuquuqul insaanka
9. Waxbarashada, anshaxa suubban iyo wadaniyadda
10. Socdaalka iyo Qurba joogta
11. Tiknoolojiyada, war-gudbinta, isgaarsiinta iyo Isu-furfurista dunida.

Siyaasadda Horumarinta Dhallinyaradu waxay iftiiminaysaa xuquuqaha iyo waajibaadka dhallinyarada wiilasha iyo gabdhaha ee ku dhaqan Puntland.

Siyaasaddu waxay saadaalineysaa in loo baahan yahay fikir cusub iyo qaab-dhismeedyo suurta gelin kara hirgelinta waxqabadyada iyo istiraatijiyadaha siyaasaddu ku talinayso. Siyaasaddu waxay soo jeedineysaa samaynta Qorshe Howleed ku wajahan dhallinyarada oo faahfaahinaya *waxa la rabo in la qabto, cidda qabanaysa, sida loo qabanaayo, iyo goorta la qabanayo.*

Intaa waxaa dheer, in Siyaasaddu soo jeedinayso in la abuuro –

- Guddi xiriiriya Siyaasadda Dhallinyarada Dalka;
- Shabakad isku xirta Dhallinyarada Puntland;
- Wakiilo danaha Dhallinyarada ee Wasaaradaha dawladda;
- Sanduuqa Horumarinta Dhallinyarada Dalka, iyo
- Samaynta Kooxda hubinta iyo dabagalka ee siyaasadda dhallinyarada dalka

- 131dhallinyarada shaqaysa ah ayaa lagu waraystay afar goobood oo ahaa meelaha shaqooyinka gurya dhisiddu ka socdeen;
- 300 oo gabdhood ayaa ka qaybgalay dood cilmiyeedyo iyo suugaan buraanbur ah;
- 34 doodo dhallinyaro oo lagu qabtay biibitooyinka shaaha oo ay ka qaybgaleen 180 dhallinyarada wax ka barata dugsiyada iyo kulliyadaha ;
- Waxaa kaloo doodihihii la qabtay ka qaybgalay 125 ah dhallinyarada ku nool xeryaha dadka soo barakacay ee IDPs;
- Buushashka lagu qayilo waxa laga waraystay 510 dhallinyaro ah oo doodo loo qabtay';
- Waxa kaloo ra'yi laga soo ururiyey 80 dhallinyarada caano-diiqda ah, dhallinyarada joogta kontoroollada ciidamada; iyo ugu dambayntii
- 25 dhallinyarada ka hawlgala idaacadaha ayaa iyaguna ku hawlanaa barnaamijyo wacyi gelin iyo la socodsiin ah oo idaacadaha laga sii daayey.

Marka laga yimaado wadatashigaas tirada badnaa ee lala yeeshay dhallinyarada, waxa kaloo isku dubaridkii siyaasaddaan ka mid ahaa hawlaha soo socda –

- Soo xigasho iyo naqdin lagu sameeyey Siyaasadaha horumarinta dhallinyarada ee waddamo kala duwan oo caalamka ah;
- Diiwaan gelinta hay'adaha iyo barnaamijyada kala geddisan ee imminka ka shaqeeya hawlaha dhallinyarada ee dalka ka socda
- Tiro badan oo shirar iyo aqoon isweydaarsiyo kala geddisan oo lagaga dooday arrimo fara badan oo saameyn ku leh nolosha dhallinyarada; iyo
- Safar heer caalami ah oo 7 dhallinyaro reer Puntland ahi ku tageen dalka Urdun si ay aqoon kororsi ku saabsan qaababka hirgelinta siyaasadaha dhallinyarada uga soo helaan dalkaas.

Siyaasaddaan Horumarinta Dhallinyarada Dalku waxay garwaaqsan tahay in dhallinyarada ku nool Puntland ay ku sugan yihiin xaalado nololeed oo qallafsan iyo caqabado waaweyn. Sidaa si le'eg, siyaasaddani waxa yaqiinsan tahay in cududda dhallinyarada aan looga faa'iideysan sidii la rabey, isla markaana aan la qaddarin dawrka waxtarka leh ee ay u leeyihiin horumarinta bulshada iyo tan qarankaba.

## 1.1 QEEXISTA MACNAHA DHALLINYARO

Siyaasadda Dalka ee Horumarinta Dhallinyarada Puntland waxaa loogu talagalay dhallinyarada gabdhaha iyo wiilasha ah ee da'doodu u dhexayso 15-30 sano jir ee ku dhaqan degaannada Puntland.Marka lagu jiro da'daasi waxay ka mid tahay kuwa ugu muhiimsan marxaladaha nolosha qofku maro waayo qofku wuxuu kasoo gudbayaa caruurnimo wuxuuna u gudbayaa qaangaarnimo buuxda, wuxuu ka soo baxayaa ardaynimo wuxuu u gudbayaa shaqaale, wuxuu ka soo baxayaa ku tiirsannaantii qoyska wuxuu u gudbayaa inuu is-debero oo noloshiisa ku filnaado. Waa marxalad u baahan taxadar, dadaal dheeraad ah si loo hubiyo in marxaladda kala wareegga ee ilmo kasta marayo u dhacdo si wanaagsan oo qof walba gaarsiin karta karti iyo qaangaarnimo dhamaystiran.

Siyaasaddan Horumarinta Dhallinyaradu waxay kaloo rumaysan tahay in dhallinyarada da'doodu u dhexayso 15 – 30 sano jirku inaysan ahayn kuwo dhinac kasta iskaga mid ah oo aan waxba ku kala duwaneyn. Da'yarta reer Puntland waxay soo mareen xaalado kala duwan iyo nolol kala duwan, taasoo ku xiran heerka dhaqaalaha qoyska, jinsiga, fayaqabka xagga lixaadka, degaanka qofku ku nool yahay, IWM. Inkastoo siyaasaddan looga gol leeyahay inay iftiimiso himilo guud, qaab hawleed iyo waxqabadyada mudnaanta koowaad ah ee ku wajahan da'yarta ku jirta 15-30 sano jir, ayaa haddana la ogsoon yahay in qaar ka mid ah jiilalka la tilmaamay ay yihiin kuwo u baahan tixgelin gaar ah. Haddaan qaarkood magacawno waxa ka mid dhallinyarada reer miyiga ah, dhallinyarada lixaadkoodu kala dhimman yahay, dhalllinyarada shaqo la'aantu daashatay, dhallinyarada qoysaska la faquuqo, da'yarta aan haysan fursado waxbarasho ee dugsigyada dibadda ka jooga iyo kuwa ku sugan xeryaha dadka soo barakacay

# Cutubka 2aad.

## Gogoldhigga Siyaasadda

### 2.1 TIXGELINO TAARIIKHI AH

Dawladda Puntland waxaa la aasaasay 1-dii Agoosto, 1998, Dawladda Puntland waxay qayb ka noqon doontaa markii dawlada Soomaliyeed oo dhexe ay dhalato. Dastuurka Puntland wuxuu aqoonsan yahay in dawlad ka dhalata Soomaaliya noqoto mid ku dhaqanta nidaamka federaaliga, kaas oo Puntland qayb ka noqon doonto. Baaxada dhulka Puntland ku fadhiyo waa **212,510** kilomitir oo laba jibaaran. Dadka Puntland ku nool waxaa lagu qiyaasaa 3.7 malyan oo 70% yihiin dadka da'doodu ka hooseyso 30 sano jir.

Puntland waxay ku jirtaa marxaladda ka soo kabashada burburkii iyo saamayntii dagaalada sokeeye. Dagaalkii sokeeye ee Soomaaliya ka dhacay muddadii u dhexaysey sannadihii 1990 ilaa 1992 wuxuu raad muuqda iyo mid dahsoon ku yeeshay nolosha dhaqan-dhaqaale iyo tan kaabayaasha adeegyada muhiimka ah ee dadka iyo dalka Puntland. Dagaaladaasi waxay horseedeen barakacista tobanaan kun oo reer Puntland ahi inay u tallaabaan dalalka deriska oo galaan xeryaha dadka Soomaaliya ka soo barakacay la dejiyo.

In kastoo Puntland inteeda badani ay degganayd (marka laga reebo gobollada xiga xuduudda Puntland la leedahay Soomaaliland), colaadaha iyo isdilka dabadheeraaday ee ka socda gobollada koonfureed wuxuu sababay barakac baaxad ballaaran oo joogta ah oo dadka ka soo haajirey gobolladaasi u soo barakacaan Puntland, taasoo culays weyn ku ah awoodda dhaqaale ee Puntland oo awalba ahaa mid licliicaya oo tabar daran. Waxaa kaloo dhaqaalaha Puntland saamayn weyn ku yeeshay raadka abaarihii daba dheeraaday ee ku habsadey dalka sannadihii 2001 ilaa 2004, taasoo ay u sii dheerayd harraatidii masiibadii Tsunaamida ee ka dhacday degaamada xeebaha badweynta Hindiya dabayaaqadii 2004tii

Deganaanshiyaha iyo xasiloonida ka jirtey Puntland laga soo bilaabo 1992 waxay suurtagal ka dhigtay dhismaha hoggaan siyaasadeed iyo mid maamul oo ka hirgasha degaamada Puntland, taasina waxaa suurta gelisey inay soo noqdaan adeegyadii bulshada ee aasaasiga ah sida waxbarashada, samaysanka ururro firfircoon oo bulshada rayidka ah iyo weliba koboc dhaqaale oo ay horseed ka yihiin shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo ganacsiga madaxa bannaan.

## 2.2 CAQABADAHA HORUMARKA PUNTLAND

*Qorsha Shanta* Sano ee *Horumarinta Puntland 2007 – 11* wuxuu tilmaamayaa tiro caqabado ah oo dalka ka hortaagan inuu horumar la taaban karo ka gaaro xagga bulshada, dhaqaalaha, siyaasadda. Caqabadahaas dawladda hasyta kuwa ugu waaweyn waxa ka mid ah: –

- **Taag darrida Hay'adaha Wax-Soo Saarka ee Dawliga ah** – Hay'adaha dawliga ah intooda badani waxay la ildaran yihiin dhaqaale xumi iyo shaqaale tayadoodu hooseyso. Intaa waxa dheer nidaamyada maamul iyo dariiqooyinka la adeegsanayo oo ah kuwo mar horeba laga guurey.
- **Ilo wax soo saar iyo fursado abuura dhaqaaale cusub oo aad u kooban iyadoo xoogga la saaray dhoofinta xoolaha isla markaana wax maalgelin dibadeed ahi aysan jirin** – Taasina waxay keentay shaqo la'aan baahsan iyo heerka dadka aan shaqayn oo aad u kordhay.
- **Kaabayaasha Dhaqaale ee Dawliga ah oo aad u yar** – waayo xilligii colaadaha ayaa burbur badan loo geystey kaabayaasha dhaqaalaha ee dawliga ahaa
- **Nuglaanshiyaha Deegaanka** – Taasoo ay keentay u turis la'aanta deegaanka, abaaraha soo noqnoqonaya iyo xaalufka.
- **Qaad Cunis Xad dhaaf ah** – Taasoo saamayn ballaaran ku leh qoys burbur maadaama dadka qabatimay cunista qaadka lagu qiyaasay15 – 20 %. Qaad cunistu waxay kaloo sababtay in lacagta adag ee ku baxda soo dejinta qaadku sannadkii ay ka badatay tan misaaniyadda dawladda
- **Hubaal la'aan ka jirta helista nidaam federaali ah** – ayadoo ay ugu wacantahay colaadaha iyo daganaan la'aanta ka taagan gobollada dhexe iyo kuwa koofureed ee dalka.
- **Baaxada Dadka ka soo barakacaya dalka gudihiisa** – Hadda, waxaa la qiyaasaa shantii qof ee ku nool Puntland in midkood yahay soo barakace ama ka soo laabtay xeryaha qaxootiga ee ku yaal dalalka deriska. Dadkaasina waxay ku nool yihiin xaalada ka hoosaysa oo ka faquuqan dadka martida ay u yihiin, sida fursadaha shaqo iyo dhaqaale ee ay helaanna oo ah mid aad u kooban.
- **Adeegyada Dadweyne oo aad u kooban** – dhallinyarada in ka yar 10% ayaa dhigata waxbarashada dugsiyada sare, helista adeeg caafimaad ee dadweynaha waxa heli kara in ka yar 21%. Dadka reer guuraaga ah, waxaa adeegyadaas hela qiyaas ka yar 1% iyo 8% waa siday u kala horeeyaane
- **Sinnaan la'aan xagga Jinsiga ah** – kuwaasoo ku salaysan xannibaado xagga caadooyinka, bulshada, dhalashada, iyo dhaqaalaha ah sababina kara u kala roonaanshaha labka iyo dhidigga ee dinacyada fursadaha.

- **Saboolnimo Baahsan**– waxaa lagu qiyaasaa dakhliga qofka sannadkii marka loo eego dhaqaalaha dalka inta u dhexaysa US$150 – 300. Waxa caddaan ah in ka badan 80% dadka reer guuraaga ah iyo 61% reer magaalku ay ku sugan yihiin xaalad Saboolnimo (qiyaasta lagu cabbiro saboolnimada oo ah (US$2 maalintiiba),

Fahmidda qodobada ku taxaluqa horumarinta dhaqaalaha ee aan kor ku soo sheegnay iyo sida wax looga qaban karo ayaa gundhig u ah dejinta Siyaasadda Horumarinta Dhallinyarada Puntland. Xaaladaha qalafsan ee aan ka soo sheekeenay waxay dhallinyarada Puntland ka dhigeen qaybaha bulshada ugu nuglaanshiyaha badan.

## 2.3 SAWIRKA GUUD EE DHALLINYARDA

Xogta laga hayo dhallinyarada oo ah mid aad u kooban waxaa adag in sawir laga bixiyo xaaladdooda dhabta ah. Hase ahaatee, macluumaad laga soo xigtay qoraallada cilmi baarisyo hore loo sameeyey iyo kuwo kale oo ay ka mid yihiin kan Qorshaha Shanta Sano ee Puntland 2007-2011-ka, kan Siyaasadda Caafimaadka iyo Nafaqada ee dawlada Puntland, qoraalada Siyaasadda Biyaha ee Puntland, Siyaasadda Waxbarashada Dawlada Puntland iyo qoraalada banraamijka HIV/AIDS ee ay wada dejiyeen Hay'adaha Qaramada Midoobey, waxaa markaa la isku duba riday xog-muujinta soo socota oo faahfaahin ka bixinaya xaaladaha da'yarta (gabdho iyo wiilal) ku nool Puntland –

- Tirada dadka Puntland oo lagu qiyaaso 3.7 malyan, ku dhowaad 70% da'adoodu way ka hooseysaa 30 sano jir.
- 65% dadku waxay ku nool yihiin miyiga iyo tuulooyinka iyadoo 30% ay ku nool yihiin magaalooyinka oo ah kuwo xawli sare ku koraya.
- Tirada wax ka barata 47-da dugsi-sare ee Puntland ku yaal waa 10,015 arday, gabdhuhu 29% ayey ka yihiin, halka wiilashuna ka yihiin 71%. Taas micnaheedu waa inay aad u yar yihiin tirada gabdhaha ee aada iskuulada

## 2.4 XAALADAHA SAAMAYNTA KU LEH SIYAASADDA

Siyaasaddaan Horumarinta Dhallinyarada Puntland waxaa saamayn ku leh siyaasadaha kale ee horumarinta barnaanijyada kala duwan ee dalka iyo siyaasado iyo baaqyo kale oo heer caalami ah. Tan kowaad, aan eegno baaqyada maxalliga ah oo ayka mid yihiin–

- **Dastuurka Dawladda Puntland** – Kaasoo si faahfaahsan u tibaaxaya qaab-dhismeedka dawladnimo iyo siyaasadeed ee dalka iyo weliba xaquuqaha muwaaddinka, iyadoo weliba si gaar ah loo tilmaamay xaquuqda durmarka iyo tan caruurta
- **Qorshaha Shanta Sano ee Horumarinta Puntland 2007-2011** – kaasoo ujeeddadiisa ugu muhiimsani tahay *"u kala hormarinta baahiyaha dalka dhan walba sida ay u kala mudnaan badan yihiin isuguna xigxigaan ee qorshayaasha xillaga dhow, xilliga dhexe iyo kuwa xilliga fog iyo dejinta yoolal bartilmaameed u ah horumarka la doonaayo in la gaaro"*. Ka sokow, iftiiminta caqabadaha hor taagan horumar la gaaro ee la doonayo in la wajaho, astaynta himilada la higsanaayo, fursadaha dhaqaale ee la haysto, kuwa iman kara iyo kala hormarinta barnaamijyada dawladdu sida ay kala mudnaan badan yihiin, waxuu kaloo qorshaha shanta sano tilmaamayaa sida ay u kala mudnaan badan yihiin natiijooyinka la rabo in laga gaaro dhanka horumarinta dhallinyarada gaar ahaan xagga caafimaadka iyo la dagaalanka cudurada
- **Siyaasadda Barnaamijka Caafimaadka ee Dawladda Puntland (2007)** – Micnaha guud ee siyaasadda caafimaadka dalku tibaaxayso waa in la helo istiraatijiyad iyo qaab-hawleedkii dalku ku gaari lahaa adeeg caafimaad oo tayo sare leh si ay u hagaagto nolosha iyo ladnaanshaha muwaadin kasta, tan qoyska iyo tan bulshada dhammaanteed. Siyaasadda caafimaadka dalku waa inay xaqiijiso helista adeeg caafimaad oo dadkoo dhan wada gaari karaan, qof waliba awoodi karo, dadku xiiseeyaan, joogtana ah, lehna qaybo ka hortag, daaweyn iyo goobo daryeel/baxnaanin. Maadaama la ogsoon yahay sida dhallinyaradu ugu nugul yihiin khataraha caafimaad xumida dalka ka jirta sida, saraynta heerka dhimashada hooyada iyo dhallanka, cudurada galmada la isugu gudbiyo, qaad cunista iyo maandooriyaha, markaa waa marag ma doonto in helintaanka adeeg caafimaad dhallinyaro noqonaayo waxqabadyada mudnaanta koowaad leh.
- **Siyaasadda Waxbarashada Puntlnad** – oo ah mirihii ka dhashay dhiraan dhirin baahsan iyo dib u eegis lagu sameeyey hannaanka waxbarashada dalkan, waxay tilmaamaysaa qaabab hawl fulineed iyo istiraatijiyado waxqabad oo lagu horumarin karo hannaanka waxbarashada dalka muddada 10-ka sano ee soo socda
- **Siyaadadda Dheellitirka Jinsiga iyo Jaangoynteeda ku Qotonta Xaalada Puntland**– oo ay isku dubaridey wasaaradda Horimarinta Haweenka iyo Danaha Qoyska waxa ay warbaxin sugan ka bixinaysaa guud ahaan doorka haweenku ku leeyihiin nolosha Puntland iyo weliba caqabadaha waaweyn ee hortaagan haweenka. Wuxuu kaloo qoraalku bixinayaa talooyin koi loogu qaadi karo kaalinta durmarku ka ciyaaraan horumarinta bulshada iyo weliba sidii loo dhimi lahaa faquuqista iyo caddaalad xumida ka jirta xagga arimaha Jinsigga

Midda labaad, Siyaasadda Dalka ee Horumarinta Dhallinyaradu waxay soo xigatey heshiisyo iyo baaqyo kala duwan oo caalami ah iyo weliba qoraallo badan oo la soo saaray 45kii sano ee la soo

dhaafay ahna kuwo si cad u faahfaahinaya muhiimadda doorka dhallinyarada iyo qaababka loo horumarin karo- Qoraalladaas kuwa ugu waaweyn waxa ka mid ah –

- **Axdiga Dawladda ku Meelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (2004)** – kaasoo qodobadiisu ay ku cad yihiin ummadda Soomaaliyeed dhulkeeda, diinteeda, astaanta qaranka, Dawladda Federaalka Ku meel Gaarka ah iyo xoriyadaha & xaquuqaha muwaaddiniinta. Waxay kaloo qodobada dastuurku tilmaamayaan xaaladaha ugu daran ee saamaynta ku leh nolosha dadka dhallinyarada ah sida, shaqada, waxbarashada, xaquuqda ka qaybgalka siyaasadda, xiriirada dhanka warfaafinta iyo helista xogta, daryeel bulsho iyo dhaqaale.
- **Barnaamijka Adduunka ee Wax-u-qabashada Dhallinyarada ilaa sanadda 2000 iyo Wixii ka Dambeeya** – Barnaamikaan oo la isku dubba ridey sannaddii 1995-tii, wuxuu tilmaamayaa toban arrimood oo xasaasi ah oo la xiriira dejinta siyaasadda iyo istiraatijiyadda horumarinta dhallinyarada. Tobanka arrimood ee la magacaabay waxay kala yihiin; Waxbarashada, shaqaalaynta, gaajada, saboolnimada, caafimaadka, deegaanka, Isticmaalka mukhaadaraadka, dibjirnimada dhalinyarada, wakhtiga ay firaaqada yihiin & waxyaabaha ay qabtaan, gabdhaha iyo dumarka dhallinyarada ah, iyo qodobka ugu dambeeya oo ah ka qaybgalka. Mar dambe, Qaramada Midoobey waxay ku dartay shan qodob/arrimood oo cusub oo kala aha:– Caalamiyeynta, Tignoolojiyada Wada-xiriirista Xog-isdhaafsiga, HIV/AIDS, Colaadaha hubaysan iyo arrimaha jiilalka duni isu wada furan

- **Baaqii Lisbon ee Siyaasadaha Barnaamijyada Dhallinyarada (1998)** –Shirkaas Wasiirada Wasaaradaha Dhallinyarada ee Caalamku waxay isku raaceen in dawladuhu soo saaraan siyaasado lagu horumariyo dhallinyarada oo sal-ballaaran leh kuna xiriirsan barnaamijyada kale horumarinta dalka.

- **Xeerka Dhallinyarada ee Qaaradda Africa (2006)** – waa xeer ay isku raaceen Shirweynahii Ururka Madowga Afrika oo lagu qeexay baahida loo qabo in dal kasta oo qaaradda ka mid ahi dejiyo siyaasad lagu horumariyo dhallinyarada iyo waxyaabaha lagama maarmaanka u ah. Isla xeerkaan waxaa lagu muujiyey xaquuqaha iyo waajibaadka dadka dhallinyarada ah.
- **Warbixinta Harumarka Adduunka (2007)** – oo ah warbixin Bangiga Adduunku soo saaro, waxa lagu iftiimiyey baahida loo qabo in maalgelin dhab ah lagu sameeyo horumarinta danaha dhallinyarada, inta taasi maqan tahayna barnaamij kasta oo horumarineed oo la dajiyaa uu yahay mid kala dhiman oo qabyo ah.

Ugu dambayntii Siyaasaddaan Horumarinta Dhallinyaradu waxay jawaab u tahay talooyinkii iyo fariimihii ay soo jeediyeen baaqyo iyo hishiisyo badan kuna saabsaanaa horumarinta iyo dhawrista dhallinyarada. Waxaana ka mid ahaa –

- **Heshiiska Xuquuqda Caruurta:–** Heshiiskaan waa kan tirada ugu badan dawladaha caalamku isla qaateen marka loo eego heshiisyada kale ee caalamku u degsadey dhawrista xaquuqul aadanaha. Heshiiska Xuquuqda Caruurtu waxaa uu ka kooban yahay tiro qawaaniin caalami ah oo dhaqangelintooda la isku wada raacay oo muran uusan ka taagneyn, Heshiisku wuxuu bayaaminayaa xuquuqaha asaasiga ee caruurta oo dhan- iyadoo aan qaarna gaar loo faquuqin. Heshiiska Xuquuqda Caruurtu wuxuu ku tusinayaa in caruurta dhammaan ay xaq u leeyihiin inay noolaadaan; Jir ahaan iyo maskax ahaan u koraan; laga ilaaliyo nooc kasta oo waxyeello ah, ku tacadiga iyo dhiigmiiradka; si buuxda uga qaybgalaan dhaqanka qoyska iyo tan bulshada. Ogolaanshaha Dawlada Puntland aqoonsan tahay heshiishka xaquuqda caruurta waxa ay ka mid tahay qodobada saldhigga u ah dejinta Siyaasadda Dalka ee horumarinta dhallinyarada.
- **Hadafka Harumarinta (2000)** – Bishii September ee sannadkii 2000, Hoggaamiyayaasha adduunka oo isugu yimi shirweynihii Qaramada Midoobey sannadkii 2000 waxay guddoonsadeen qodobbo loogu magac daray harumarka dunida 2000 jirsatay. Qodobada/yoolalka waxay diiradda saarayaan arimaha aasaaska u ah Siyaasaddan Horumarinta Dhallinyarada, kuwaasoo ay ka mid yihiin la dagaalanka saboolnimada Cudurada, Wax akhris/qoris la'aanta, Nabaad guurka dhulka iyo sinnaan la'aanta Jinsiga.

# Cutubka 3aad

# Himilada, Mabaadii'da & Yoolalka

## 3.1 HIMILADA

Baaqa himilada soo socda waa mid si wanaagsan u soo koobaya waxtarka kaalinta dhallinyarada Puntland ee harumarinta bulshadooda iyo weliba xaaladaha loo baahan yahay si kartida waxqabad u hurumarsanaato.

***Bulsho dhexdeeda (Puntland) dhallinyaradu wiilal iyo gabdhaba ay ka yihiin muwaadiniin la qaddariyo lana xushmeeyo, kuwaasoo awood u leh inay kaalin firfircoon ka qataan arimaha bulshada, dhaqanka, deegaanka, waxbarashada iyo fursadaha shaqada. Dhallinyaro awood u leh inay dhisaan ummad ku waarta nabad iyo barwaaqo lehna karti, isku kalsoonaan iyo dareensanaan sare oo ay ku maareeyaan marxaladaha qallafsan iyo fursadaha soo wajaha labadaba.***

## 3.2 MABAADII'DA LAGA DUULAYO

Mabaadii'da laga duulayo waxay ka tarjumayaan caqiidada iyo xaqaa'iqa kale ee la aaminsan yahay, kuwaasoo aasaas u ah dejinta Siyaasaddan iyo qodobada ay mudnaanta siineyso. Muddadii ay socotey dejinta siyaasada dhallinyaradu, waxa laysla wada qaatay mabaadii'da soo socota:-

**Caqiidada Islaamka** – Haysashada, ku dhaqmista mabaadii'da caqiidada islaamku farayso iyo barashada Shareecada Islaamka.

**Midnimo Qaran, Wadaninimo iyo Sharaf** – Daacad u noqoshada midnimada iyo wadajirka Puntland, caadada, dhaqanka suubban iyo Dastuurka Dawladda Puntland.

**Qaddarinta Dhallinyarada** – Aaminsanaanta in dhallinyaradu yihiin xubin muhiim u ah horumarinta dalka una baahan yihiin in lagu qaddariyo laguna xushmeeyo ahaanshiyaha ay yihiin mustaqbalkii dalka iyo weliba kaalintooda. Siyaasaddani waxay gabdhaha iyo wiilasha dhallinyarada ah u aragtaa inay yihiin kuwa isbeddelka wanaagsan horseedi kara ee aysan ahayn

ka faad'iidaystayaal keliya. Siyaasaddu waa mid u ololaynaysa ka qaybgal firfircoon inay dhallinyaradu ku yeeshaan go'aan ka gaarista qorshayaasha iyo hawlaha kale ee dhallinta saamaynta ku leh

**Sinnaanta Jinsiga** – Yaqiinsanaanta xagga caddaaladda iyo sinnaanta raga iyo dumarka ee ku salaysan sida shareecada Islaamku qabto. Siyaasaddani waxay dhiirigelinaysaa sinaanshiyaha hannaan waxqabad oo gabdhaha iyo wiilashu u siman yihiin fursadaha horumarka, isla markaana waxay u ololaynaysaa dabar-goynta dhaqamada ka hor istaagaya haweenka in ay helaan fursado la mid ah kuwa ragga.

**Dariiqooyin Horumarineed oo isku-dhafan**– Siyaasaddan horumarinta Dhallinyarada Puntland waxay dhiirigelinaysaa adeegsiga dariiqooyinka horumarka ee isku-dhafan dhinacyo badanna isugu jirta iyadoo la adeegsanaayo xirfado iyo aqoon waxqabad oo kala gedisan si loo horumariyo barnaamijyada iyo danaha dhallinyarada.

**Adeeg-Gaaritaan** – Balanqaadyada ah in dhallinyarada Puntland helaan fursado ay ku gaari karaan kagana faa'iideysan karaan adeegyada barnaamijyada, iyadoo aan loo eegin jinsigooda, fayaqabka lixaadkooda, deegaamadooda, xaaladdooda dhaqaale iyo mid dhaqanba. Siyaasaddani waxay awoodda saaraysaa sidii dhallinyarada beelaha laga tiro badan yahay iyo kuwa la faquuqaba uga faa'iideysan lahaayeen si la mida kuwa kale.

**Iskaashiga iyo Wax wada qabsiga** – Garwaaqsashada baahida loo qabo iskaashi dhex mara dhammaan qaybaha kala duwan ee ku lug leh horumarinta dhallinyarada, sida wasaaradaha dawladda, ururada bulshada rayidka ah, ururada horimarineed ee caalamiga ah, ganacsatada iyo ururada dhallinyarada ah.

**Dhawrista Deegaanka iyo Dhiirigelinta Fal-dhaqameedyada Suubban** – U kuur galka xaaladda nuglaanta badan ee deegaanka Puntland ku sugan tahay iyo sida loogu baahan yahay in la xaqiijiyo horumar la gaaro iyadoon dhaawac la gaarsiin dhaxalka jiilalka mustaqbalka dambe.

**Xoojinta Nabadda** – Ka dhabaynta waxqabadyo iyadoo la isticmaalayo hannaan iyo dariiqooyin sii xoojiya nabadda iyo amniga Puntland.

**Xilkasnimo iyo Hufnaan** – Ku sifoobidda xilkasnimo iyo hufnaan heer sare ah oo ay dhaqangeliyaan dhammaan hay'adaha iyo shaqsiyaadka ku hawlan fulinta adeegyada iyo barnaamijyada horumarinta dhallinyarada.

## 3.3 YOOLALKA SIYAASADDA HORUMARINTA DHALLINYARADA

Yoolalka Siyaasadddani waa kuwo si guud u tilmaamaya natiijooyinka ay Siyaasadda Dhallinyarada Puntland rajeynayso inay gaarto. Iyadoo laga duulaayo himalada aynu kor ku soo xusnay iyo mabaadiida la tilmaansanayo, ayaa waxaa la qaatay lixda yool ee soo socda:

1. In la suurtageliyo qaab-howleed ka kooban dhinacyo waxqabad oo badan iyo dariiqooyin isku dhafan iskuna xiran oo ku wajahan horumarinta dhallinyarada Puntland, wiilal iyo gabdhaba.
2. In si cad loo tilmaamo barnaamijyada iyo waxqabadyada ay siyaasaddu mudnaanta koowaad siinayso
3. In la xoojiyo dhismaha, Isku-xirka, dabakhista iyo maaraynta istiraatijiyado bartilaameedkoodu yahay horumarinta dhallinyarada
4. In faham buuxa iyo aqoon loo yeesho caqabadaha jira, fursadaha la haysto iyo cidda ama dhinacyada wax ku biirin kara horumarinta danaha dhallinyarada,
5. In la dhiiri geliyo dowrka dhallinyarada ka qaybgalka firfircoon iyo hoggaaminta ay ka ciyaari karaan bulshada dhexdeeda iyo tan nolosha qaranka.
6. In la dhiirigeliyo heerka akhlaaqda suubban muqdarnimada iyo xushmadda ay dhallinyaradu u hayaan mabaadi'da islaamka, qoysaskooda, dhaqankooda iyo qarankoodaba loogana digo ku biirida kooxa xagjirka ah.

# Cutubka 4aad.

## Meelaha Mudnaanta

## Istiraatijiyadeed la Siinayo

Siyaasadda Hurumarinta Dhalliyarada Dawladda Puntland waa qaab-hawleed guud oo loogu talagalay inuu hago ama tilmaamo hay'adaha iyo dhammaan ururada kale ee ku hawlan horumarinta dhallinyarda. Dhallinyarada reer Puntland, gabdho iyo wiilalba waxaa horyaalla marxalado ad-adag iyo weliba fursada qaali ah. Haddaba, siyaasaddaani waxay tilmaamaysaa kow iyo taban (11) ujeeddo oo Istiraatiji ah, oo mid walibana ay la socdaan waxqabadyada mudnaanta koowaad la siinayo.

## 4.1 BARASHADA XIRFADAHA IYO TABABARRADA

Dastuurka Dawladda Puntland, wuxuu qeexayaa:- "In waxbarashadu tahay xuquuq aasaasi ah oo muwaadiniinta oo dhammi inay helaan ay waajib tahay. Dhammaan muwaadiniintu waxay xaq u leeyihiin waxbarashada assaasiga ah iyo tan dugsiyada sare oo lacag la'aan ah. Dawladduna waa inay mudnaanta koowaad siisaa, dhiirigelinta, ballaarinta iyo baahinta waxbarashada iyo dugsiyada dawliga ah. Waxbarashadu waxay noqondoontaa mid ku qotonta danta ummadda, waana in la wada gaarsiiyaa dalka oo dhan".

Waxbarasho tayeysan iyo tababaradu waxay laga maarmaan u yihiin sida lagu gaari karo horumar bulsho iyo dhaqaale oo waara. Sida ku cad siyaasadda waxbarashada Puntland: "*dad bartay aqoon ayaa awood u yeelan kara inay wax ku biiriyaan gacanna ka geysataan horumarinta dhaqaalaha, iskuduubnida bulshada iyo dhismaha dhaqan dimoqoraaddi ah oo ku salaysan mabaadi'da Islaamka. Intaa waxa sii dheer, aqoonta oo la horumariyo waxay Puntland gaarsiinaysaa inay si karti leh uga qaybqaadato arrimaha caalamiga ah*".

Siyaasaddan Horumarinta Dhallinyaradu waxay hoosta ka xariiqeysaa sida xaqiijinta hannaan waxbarasho aqooneed iyo tababaradu ay udub-dhexaad ugu yihiin awoodsiinta da'yarta reer Puntland, iyo guud ahaanba hagaajinta nolosha bulshada. Hase yeeshee, waxbarashada iyo tababaradu waxay doorkooda ciyaari karaan oo keliya marka wax laga qabto caqabadaha waaweyn ee iminka ku hor gudban helitaanka fursaddii waxbarasho, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- Helitaanka fursadaha waxbarashada sare oo aad u kooban
- Tirada ardayda dugsiyada dhigata oo aan wali gaarin meeshii la rabay
- Tiro aad u badan oo caruur ahi oo ah dadka soo barakacay. waxay gafeen fursaddii ay wax ku baran lahayeen dagaalada sokeeye awgood
- Heerka wax akhris/qorista bulshada oo aad u hooseysa
- Dhaqanka bulshada ee xaga waxbarashada oo ah mid aan gabdhaha tixgelin gaara ah siinayn
- Tirada Dugsiyada jira oo ka yar baahida jirta
- Asaaska iyo awoodda dhaqaale ee jirta oo aad u kooban
- Fursadda is-qorista iyo dhigashada gabdhaha oo aad u liidata
- Ardayda oo gaajaysan waalidkood oo aan shaqayn awgeed
- Heerka saaqidaada ardayda marka la gaaro dugsiyada sare oo aad u sareeya
- Mac-hadyada tababarada macalimiinta oo aan ku filayn baahida macallin ee Puntland
- Macallimiinta dumarka ah ee ka hawlgala dugsiyada oo aad u yar
- Macallimiinta tababaran oo aad u yar
- Gunnada iyo mushaharooyinka la siiyo macalliminta oo aad u hoosaysa
- Arday farabadan oo ka hara waxbarashadoodii markay awoodi waayeen bixinta kharashka laga rabo bil walba
- Danaynta barashada xagga xirfadda /aaladda ICT oo hoosaysa
- Cadaadis xagga qoyska ah oo bartihii ka mamnuuca tegidda dugsiga
- Ka qaybgalka bulshada iyo qiimeynta waxbarashada oo guud ahaan hoosaysa
- Balwada iyo isticmaalka maandooriyayaasha ee bulshada dhexdeeda
- Tirada Dugsiyo laga barto farsamada iyo xirfadaha oo aad u yar.
- Qiimaha buugaagta iyo agabka waxbarasho oo la waayo ama aan la goyn karin.
- Hannaanka iyo adeegga waxbarasho ee ka jira degaamada ka baxsan magaalooyinka waaweyn oo xadidan.
- Shaqo la'aanta haysata ardayda dhammaysay dugsiyada iyo kuwa ka soo qalin-jebiyey mac-hadyada oo aad u sarraysa
- Tirada ardayda dhigata dugsiyada waxbarashada dadban oo aad u yar.

## Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 1-aad:

In la sii wado dadaalka loogu jiro horumarinta hannaan waxbarasho oo tayo leh

*Waxqabadyada Mudnaanta leh*

1. Ku dhaqanka iyo hirgelinta Man-hajka waddaniga ah.
2. In la taageero lana joogteeyo qiimaynta iyo kor u qaadista gunnada macallimiinta
3. Awood-siinta kaabayaasha iyo macaahidda waxbarashada laguna qalabeeyo dhammaan agabka ay u baahan yihiin

## Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 2-aad:

In kor loo qaado fursadaha waxbarashada ee dhammaan da'yarta Puntland si ay u heli karaan dhammaan heerarka nidaamka waxbarasho, kuwaas oo u qalma kuna habboon danahooda iyo awoodahooda.

*Waxqabadyada Mudnaanta leh*

1. Gaaris hannaan waxbarasho lacag'la'aan ah oo loo dhan yahay
2. Kordhin 20% tirada ardayda dhigata dugsiyada sare
3. Ballaarinta tirada goobaha dhallinta 19-22 sano jirka ahi ay ka heli karaan adeegga waxbarashada sare.
4. In isha lagu hayo jiritaanka iyo kororka helista fursado waxbarasho, gaar ahaan sida hannaanka waxbarasho ee jiraa u noqdo mid damnaanad qaadi kara inay fursado waxbarasho helaan da'yarta saboolka ah, kuwa ku nool miyiga, kuwa ku nool duruufaha qalafasan, kuwa u baahan qaababka-waxbarashadda gaar ah iyo weliba kuwa dhaqaale ahaan saboolka ah
5. Meelaha miyiga ah oo laga hirgeliyo dugsiyo la guurguura qoysaska reer guuraaga ah.
6. Dugsiyada oo dhan laga hirgeliyo barnaamijyo quudin iyo nafaqayn ah.
7. In dugsiyada oo dhan laga hirgaliyo maadada ciyaaraha dhaqanka soomalida

## Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 3-aad:

In la xaqiiyiyo in Wiilasha iyo Gabdhuhuba si siman uga wada qaybgalaan fursadaha waxbarashada.

*Waxqabadyada Mudnaanta koowaad leh*

1. Samaynta ololeyaal lagu wacyigelinaayo waalidiinta, bulshada, hoggaamiyayaasha, siyaasiinta iyo culumada diinta oo ku saabsan muhiimmadda waxbarista dumarka iyo hablaha da'yara ah

2. Dejinta iyo hirgelinta qorshe lagu kordhinaayo tirada gabdhaha/dumarka u tababaran xirfadda macallinimada
3. In lala socdo arimaha kawada-qaybgalka siman ee jinsiga.
4. Dejinta fursado waxbarasho dadban oo ay ka faa'iidaystaan dhallinyarada hore uga hartay waxbarashada/dugsiyada
5. In sare loo qaado mustawaha waxbarashada lana badiyo dugsiyada farsamada iyo xirfad barashada, isla markaasna la xoojiyo aqoonta ardayda ee la xiriirta tababarada fursadaha dhinacyada ganacsiga.
6. In lagu dhiirigeliyo nimanka qaba gabdhaha da'yarta ah inay u oggolaadaan xaasaskooda inay sii wataan waxbarashadooda.

## Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 4-aad:

In dib-u-eegis lagu sameeyo manhajka waxbarashada dugsiyada farsamada iyo jaamacadaha lana waafajiyo dhisidda dhaqanka, baahida dhaqaale iyo fursadaha shaqo ee ka jira Puntland

*Waxqabadyada Mudnaanta koowaad leh*

1. Xoojinta kaabayaasha hay'adaha waxbarashada iyo ku qalabaynta agabka ay u baahan yihiin.
2. Muhiimad weyn in la siiyo barashada xagga xirfadaha ku shaqaynta iyo adeegsiga aaladda Kumbiyuutarka (ICT) laguna daro manhajka cusub
3. in tababaradu lagu daro mawduucyo ku saabsan barashada xirfadaha in qofku iskiis u shaqaysto, sida samaynta ilo-dhakhli abuuris oo dugsiyadu yeeshaan
4. Soo bandhigis adeegyo wax-baris oo lagu shaqaysan karo.
5. Abuuris xiriir xooggan oo dhexmara waxbarashada iyo bulshada hantiileyda gaarka ah

## 4.2 KA QAYBGALKA DHALLINYARADA & HORUMARINTA HOGGAAMINTA

Hadal-haynta aad u soo noqnoqotay intii ay socdeen kulamadii wadatashiga ee dejinta Siyaasadda Horumarint Dhallinyarada Puntland, waxay ahayd xiisaha dhallinyaradu u qabaan in kaalin weyn oo ka qaybgal laga siiyo arrimaha bulshada iyo tan dalkaba. Dhammaan baaqyada caalamiga ah ee ku saabsan horumarinta iyo awood-siinta dhallinyarada waxay xoogga saaraysaa baahida loo qabo abuurid jawi heer qaran ah oo suurta gelin kara in ka qayb galka firfircoon iyo kaalinta hoggaamineed ee dhallinyaradu soo ifbaxdo

Waxtarka waddinayaddu u leedahay dhallinyarada Puntland waa mid u baahan in si buuxda loo aqoonsado lana sii kobciyo. Gaar ahaan, Siyaadddа waxbarashada Puntland waxay ku talinaysaa: *In hannaanka waxbarashada qaranku kaalin buuxda ka ciyaaro sidii dabeecadaha ka qaybgalka danta guud iyo waddaniyadda looga dhigi lahaa mid ku abuuran qofkasta oo ka mid ah bulshada reer Puntland.*

**Arrimaha ugu daran** ee istiraatijiyaddaani mudnaanta siinayso –

- Aqoonsi la'aan iyo inaan la ixtiraamin waxtarka dhallinyarada
- Aqoonsiga Baaqa Dhawrista Xaquuqda Caruurta
- Adeeg-Bulsho iyo Iskaa-wax-u qabsashada
- Xiriirada Caalamiga ah
- Muhiimadda dhisida waddaniyada iyo qaranimada
- Maqnaanshiyaha waxbarashada waddaniyadda ay ka maqan tahay manhajka la dhigo
- Dirirta, qolo-qolada iyo qabyaalladda
- Xaquuqaha iyo waajibaadyada dhallinyarada
- Ka maqnaanshaha dhallinyaradu aysan ku jirin golayaasha xukuummada iyo tan baarlammaanka
- Xir-xirnaanta xagga dhaqanka iyo ka qaybgalka dhallinyarada
- Jiris la'aanta fursado ka qaybgal
- Jiris la'aanta dallad xiriirineed oo ka dhexeysa dhallinyarada Puntland
- Aqoonsi la'aan wasiirada Puntland, ururada caalamiga ah iyo kuwa waddaniga ahiba aaney aqoonsaneyn kaalinta ka qaybgalka dhallinyarada
- Awood xumo ku habsatey ururada dhallinyarada ee jira.

## Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 1-aad:

In la xoojiyo wacyiga dhallinyarada iyo guud ahaan bulshada ee ku wajahan firfircooni iyo mas'uuliyad muwaaddinimo.

*Waxqabadyada Mudnaanta leh*

1. Xoojinta manaahijta dugsiyada lagu dhigo laguna daro waxbarashada qiimaha waddinayadda iyo dariiqa toosan ee islaamnimo iyo ka hortaga faafinta xag-jirnimada
2. In la dhiiri-geliyo hal abuuur, fikir u horseeda dhallinyaradu in ay dabakhaan ixtiraamka, iyo dulqaadka oo ay ku jirto dhinaca jinsiga,
3. In loo fududeeyo dhallinyaradu inay helaan golayaal iyo fursado tababarro oo horumariya xirfadahooda hoggaaminta

4. In la asteeyo lana hirgeliyo barnaamijyo iyo fal-qabadyo sare loogu qaadayo waddaniyad jacaylka dhallinyarada

**Ujeeddo Istiraatiijiga ah ee 2-aad:**

In taageero la siiyo dhallinyarada si ay uga qayb galaan hawlaha lagu horumarinayo bulshada

*Waxqabadyada Mudnaanta leh*

1. Dheeri-gelinta iyo in taageero la siiyo barnaamijyo wax ka tari kara adeegyo-bulsho, iskaa wax-u-qabsonnimada arrimaha dhallinyarada
2. Dhiiri-gelinta xubinimada dhallinyarada ee heer walba oo ah xagga dawladda, ururada aan dawliga ahayn, guddoonka bulshada iyadoo loo marayo
    - Guddiyada talo bixinta dhalliyarada;
    - Samaynta kooxo ka tirsan ururada dhallinyarada oo u xilsaaran kormeerka iyo qiimaynta siyaasadda dhallinyarada dalka.
3. In dib loo soo nooleeyo qabashada barnaamij abaalmarin-sannadle ah oo la guddoonsiiyo dhallinyarada waxtar muuqda ku soo biiriyey nolosha bulshada iyo tan dalkaba
4. In la sii ballaariyo deeqaha dhaqaale ee yar-yar oo ay bixiyaan hay'adaha Qaramada Midoobey, si loo dhiirigeliyo mashaariic kale oo adeeg bulsho leh oo dhalliyaradu isku soo dubarideen
5. U ololayn in hoos loo dhigo da'ada 30-ka sano ah ee loo cayimay ka mid noqoshaha xubinnimada baarlamaanka
6. In la dhiso lana hagaajiyo awoodda waxqabad ee ururada/'kooxaha dhallinyarada
7. In la sameeyo dallad xiriirin oo heer Puntland ah oo sii dardar gelisa wacyigelinta, baraarujinta iyo awoodsiinta dhallinyarada Puntland.
8. In la asteeyo maalin loo dabbaaldego (la xuso) maalinta dhallinyarada Puntland

**Ujeeddo Istiraatiijiga ah ee 3-aad:**

In la aqoonsado muhiimadda ay leedahay Heshiiska Xaquuqda Caruurta iyo hirgelinta waajibaadyada ku xusan

*Waxqabadyada Mudnaanta leh*

1. In Dawladda Soomaaliyeed lagu qalqaaliyo inay saxiixdo Heshiiska Xaquuqda Caruurta
2. Hubinta iyo dabagalka hirgelinta Heshiiska Xuquuqda caruurta.

## 4.3 HUB-KA-DHIGISTA, AMNIGA IYO XOOJINTA NABADDA

Intii lagu dhexjirey wadatashiyadii heerka gobol ee samaynta siyaasadda dhallinyarada, da'yartu waxay mar walba si cad u sheegayeen sida ay lagama maarmaanka u yihiin xaqiijinta hub ka dhigista, sugidda amniga iyo xoojinta nabadda

**Arrimaha ugu daran** ee istiraatijiyaddani mudnaanta siinayso –

- Ciidamaynta caruurta da'yarta ah iyo sidii hub ka dhigis loogu samayn lahaa
- Burcad badeedda iyo qafaalashada madax furasho doonka ah
- La'aanta fursado shaqo
- Deganaansho la'aanta iyo colaadaha ragaadiyey gobollada Koonfureed iyo kuwa Dhexe
- Khilaafaadka xudduudaha (Sool iyo Sanaag) iyo doorka dhalinyarada
- Dadka soo barakacay.
- Baahida loo qabo ilo shaqo abuuris oo kale iyo fursado tababarro
- Doorka iyo kaalinta dhallinyaradu ka qaadato dariiqadda xoojinta nabadda
- Tuuganimada iyo baarashada dhallinyarada shaqo la'aantu ku dhacday
- Jactad
- Sicir barar
- Ismticmaalka maandooriyaha iyo qabatinkiisa
- Jahliga
- Saboolnimo.

## Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 1-aad:

In la hirgeliyo barnaamij hub ka dhigis heer qaran ah.

*Waxqabadyada Mudnaanta leh*

1. Ka qaybgelinta dhallinyarada marxalladda dejinta iyo hirgelinta barnaamij hub ka dhigis oo heer qaran ah, dib u heshiisiinta, nabadaynta iyo xallinta khilaafaadka..
2. Siinta tababaro kale iyo barnaamijyo shaqo abuuris oo loogu talo-galo da'yarta la ciidameeyey.

3. Siinta xirfado horumarineed iyo fursado shaqo abuuris si dhallinyarada looga ilaaliyo inaan loo qoran miliishiyaadka hubaysan.

### Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 2-aad:

In la sameeyo olole ka dhan ah laguna takooraayo Burcad badeednimada iyo dad qafaalashada.

<u>*Waxqabadyada Mudnaanta leh*</u>

1. Dejin qorshe iyo hirgelinta olole hoos loogu dhigayo ku biirista burcad badeednimada iyo dad qafaalashada iyadoo lagu salaynayo mabaadiida diinteenna islaamka iyo waxa ay ka qabto falalka noocaas ah..
2. Hirgelinta waxbarasho, tababarro iyo ilo shaqo abuuris oo kala duwan.

### Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 3-aad:

In la samayo wacyigelin iyo baraarujin ku saabsan xoojinta nabadda iyadoo la adeegsanayo dariiqooyin ololeyn ah.

<u>*Waxqabadyada Mudnaanta leh*</u>

1. Dhiirigelinta ururada dhallinyarada si ay uga mid noqdaan barnaamijyada xoojinta nabadda.
2. In manhajka dugsiyada lagu daro maaddo ku saabsan xoojinta nabadda.
3. Qabashada shirweyne ururada dhallinyarada oo sannadle ah.
4. Abuurista ururo dhallinyaro oo u heellan ka shaqaynta nabadda.

## 4.4 ILO-NOLOLEEDYO DHAXALGAL AH IYO SHAQO-SIINTA DHALLINYARADA

Intii lagu guda jirey wadatashiyadii xiriirka ahaa ee heer gobol, shaqo la'aanta iyo baahida loo qabo abuuris ilo shaqo waxay ahaayeen qodobada dhallinta Puntland ku haya welwelka ugu badan. Heerka shaqo la'aanta dhallinyarada (oo ay ku jiraan dhallinyarada dhammaysay waxbarashada dugsiyada sare iyo tan heer Jaamacadeed) aad ayey u saraysaa. In la gaaro marxalad deggan oo dhallinyarada siin karta fursado shaqo-helis waa qodob muhiimad badan u leh yaraynta iyo la dagaallanka saboolnimada iyo weliba koboca dhaqaalaha dalka

Si loo wajaho xaaladda shaqo la'ida haysata dhallinyarada Puntland, siyaasaddan horumarinta dhallinyarada dalka waxay iftiiminaysaa muhiimadda qodobada soo socda:–

- Garwaaqsashada in xaaladda shaqo la'aanta ba'an ee haysata dhallinyaradu ay sababteedu tahay yaraanshaha fursadaha shaqo siinta iyo ciriiriga dhaqaalaha ee dalka ka jira.
- Siyaasadda horumarinta dhallinyaradu waxay aqoonsan tahay xiriirrada ka dhexeeya qodobada sida nabadda iyo shaqo la'aanta, doorka shirkadaha gaarka ah, habboonaanta nidaamka waxbarashada iyo khibradaha laga kasbado tababarada iyo shaqo abuurista, iyo
- Abuurista iyo hirgelinta Qorshe Qaran oo Shaqo siiya Dhallinyarada

**Arrimaha ugu waaweyn ee** Siyaasaddani wajahayso waxa ka mid ah –

- Meelaha ay ka jiraan dhaqdhaqa dhaqaale oo kooban
- Xaddidnaanta dadaallada shaqo abuur
- Waxtarkii looga baahnaa dawladda dhexe oo kooban
- Saraynta heerka shaqo la'aanta dhallinyarada
- Maqnaanta Qorshe-fulineedkii Shaqaysiinta Dhallinyarada Dalka
- Jiris la'aanta adeeg talosiin/talabixin shaqaalaynta iyo shaqo doonista
- Xaddidnaanta xirfadaha iyo fursado tababarro
- U kala roonaanta gabdhaha iyo wiilasha.
- Xarumaha iyo dugsiyada farsamada gacanta laga barto oo aad u yar
- Wacyi galinta qurba joogta Puntland inay wadanka maalgashadaan oo hooseysa
- Fursado la kala doorto oo shaqo iyo awoodista maciishadda oo aad hoosaysa.
- Amni xumo iyo colaadaha meelaha qaarkood
- tahriibta dhallinyarada yar yari dalka dibbadiisu ku aadayaan oo xad dhaaf ah
- khasaarihii laga dhaxlay masiibadii Tsunamiga ee dhacday 2004 oo kaluumaysatada kala tagtay doonyihii iyo qalabkii kalluumaysiga iyo maraakiib si sharci darro ah u xaalufisay khayraadkii badaha Puntland.
- Dhallinyarada oo laga takooro fursadaha shaqo siinta
- Iyadoo aysan jirin barnaamijyo u ololeeya horumarinta dhallinyarada
- Iyadoo aysan jirin dallad ama hay'ad u xilsaaran xiriirinta hawlaha iyo danaha dhallinyarada ee heer qaran
- Wasaaradda shaqada iyo shaqaalaha oo ah mid tabar darran.

## Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 1-aad:

In la dejiyo oo la hirgeliyo Qorshe hawleedyo lagu shaqo siinaayo dhallinyarada oo heer qaran ah

*Waxqabadyada Mudnaanta leh*

1. In laga faa'iidaysto khibradda laga dhaxlay qaababkii horay caalamka loo soo dabbakhay ee horumarinta fursadaha dammaanadqaadka u noqon kara korista maciishada iyo shaqo-siinta dhallinyarada
2. In la Qaato lana dabbakho qaab-dhismeed qorshe-hawleedka qaran ee shaqaalaynta dhalinyarada, Sidii laga soo jeediyey Xiriirka Shaqo siinta Dhallinyarada, waxana ka mid ahaa:
   - Xirfado shaqo lagu heli karo: – in la maalgeliyo waxbarashada iyo tababarrada xifradeed oo la siiyo dhallinyarada isla markaana sare loo qaado maxsuulka ka soo baxa maalagelinta
   - U sinnaanta Fursadaha – waa in wiilasha iyo gabdhuhu u sinnaadaan fursadaha jira si isle'egna uga wada faa'iideysan karaan
   - Xirfad Ganacsi – in dhallinyarada loo sahlo inay samaysan karaan dhaqdhaqaaqyo ganacsi oo ay iyagu iska leeyihiin
   - Shaqo-Abuuris – waa in siyaasadda baayac mushtarka dalku dhiirigelisaa shaqo abuurista iyo shaqaalaynta dhallinyarada
3. In la dhiirigeliyo oo gacan la siiyo fursado dhallinyarada u sahla inay iskood u shaqaysan karaan taasoo lagu gaari karo barista aqoon iyo xirfado wax soo saar leh iyo in la siiyo qiyaas dhaqaale lacageed oo ay ganacsi ku bilaabi karaan.
4. In dhallinyarada loo sameeyo mashaariic tababarro gaar ah sida barashada Kumbiyuutarada, Beero falashada, Farshaxanka, Kalluumaysiga IWM.
5. In la sahmiyo dariiqooyin kor loogu qaado isku xirnaanta waxbarashada iyo mac-hadyada tababarada iyo suuqayda dadka shaqaaleeya, Si taas loo gaarana waxa loo baahan yahay in la sameeyo xafiisyo ka tala bixiya oo diiwaan geliya dhallinta leh xirfado shaqo.
6. In la sameeyo barnaamijyo xiriiriya dhallinyarada ka hartay waxbarashada oo u jihaysa siday shaqooyin uga heli lahaayeen shaqo bixiyayaasha.
7. In la asteeyo lana dhiirigeliyo fursado in jaaliyadaha dibaddu sameeyaan maalgashi iyo mashaariic dhallinyaradu shaqooyin ka heli karaan.
8. In wasaarada shaqada, dhalinyarada iyo ciyaaruhu sameyso xiriirinta, la socodka iyo hubinta habsami fulinta Qorshe-Hawleedka qaran ee shaqaalaynta dhalinyarada.
9. In la abuuro barnaamijyo kor loogu qaadayo wacyiga dhallinyarada kuna baraarujiya muhiimmadda ay leedahay in qofku isku-tashado iyo waddinayadda.

# 4.5 MADADAALADA, CIYAARAHA, XARUMAHA DHALLINYARADA, FARSHAXANKA IYO DHAQANKA

Siyaasadda Dhallinyarada Puntland si buuxda ayay u taageersan tahay baahida loo qabo in la kordhiyo lana horumariyo noocyada iyo fursadaha ciyaaraha kala duwan, madadaalada, farshaxanka kuwaas oo gabdhaha iyo wiilashuba si isle'eg uga wada faa'iideysan karaan. Hawlaha noocaan ahi waxay ka qaybqaataan caafimaadka jirka, caqliga iyo dabeecadaha wanaagsan ee dhallinyarada, waxay kaloo wax ka taraan horumarinta hoggaaminta iyo hagaajinta xirfado wax tar leh.

**Arrimaha ugu waaweyn ee** Siyaasaddani wajahayso waxa ka mid ah:-

- Arrimaha dhalinyaradu ku madadaashaan oo kooban
- Xarumo laga helo adeegyada kala duwan ee dhallinyaradu u baahan tahay oo kooban
- Dhallinyarada lixaadkoodu dhimman yahay oo aan haysan wax fursado ah
- Maalgelin lagu sameeyo xarumaha dhallinyarada iyo ciyaaraha oo aad u kooban
- Goroomo ciyaareed iyo xarumo madadaalo oo yar
- Maktabado iyo goobo aqoon kororsi oo xadidan
- Goobo caruurtu ku madaddaalato sida jardiinooyin iyo goobo-xannaano oo aan jirin
- Tartamada ciyaarahu aad bay u kooban yihiin
- Dhul ku habsiga iyo kala boobka bogcadaha oo baahsan
- Qorshayaal magaalayn iyo Degaamaynta ma jiraan
- Ma jiro Madxaf qaran oo kaydiya taariikhda Puntland siiba dowrarkii dhallinyarada
- Munaasibado dhaqameedyada oo aad u kooban

## Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 1-aad:

In la qorsheeyo lana hirgliyo dhismaha iyo barnaamijka xarumo dhallinyaro iyo ciyaaro oo adeegyo badan leh

*Waxqabadyada Mudnaanta leh*

1. In la soo nooleeyo mashaariic lagu horumariyo kaabayaasha muhiimka ah sida garoomo ciyaaro, xafiisyo iyo xarumo dhallinyaro kuwaas oo laga hirgeliyo dhamman gobollada iyo degmooyinka kala duwan ee Puntland muddo 5 sano ah.

2. In la abuuro lana xoojiyo xiriirka u dhexeeya dugsiyada, ciyaaraha iyo barnaamijyada kale ee ururada dhallinyaradu abaabulaan si looga wada faa'iideysto isticmaalka garoomada iyo tasiilaadka kale ee la wadaago.
3. In la abuuro kooxo dhallinyaro ah oo u tababaran xirfado kala duwan sida ciyaaraha, hoggaaminta, abaabulista iyo maamulka si ay gacan u siiyaan kuwa kale markay isticmaalayaan adeegyada, xarumaha iyo garoomada dhallinyarada.
4. In la diyaariyo barnaamijyo warbahineed oo isugu jira hanuunin iyo wacyigelin sare loogu qaadayo fahamka iyo wacyiga waalidiinta, bulshada, iyo culimada ee ku saabsan faa'iidooyinka ciyaaraha, hal abuurka, madaddaalada iyo barnaamijyada kaleba ay u leeyihiin dhallinyarada gabdho iyo wiilalba.
5. In la sameeyo xiriiro,naadiyo iyo kooxo ciyaartooy ah si loo abaabulo tartammo heer degmo, gobol iyo heer qaran ah
6. In la dejiyo oo la hirgeliyo istiraatijiyado sare loogu qaadayo garoomada iyo golayaasha kale ee dumarka iyo gabdhuhu ku ciyaaraan.
7. Abuurista xiriirro ka dhexeeya xarumaha iyo naadiyada dhallinyarada ee kala duwan ee ka dhisan dalka.
8. In degmooyinka iyo magaalooyinku u qoondeeyaan dhul bannaan iyo barxado dhallinyaradu ku ciyaaraan.
9. In dhallinyarada miyiga ku dhaqan lagu dhiirigeliyo lagana qaybgeliyo ciyaaraha (gaar ahaan tartammada oroddada, bootinta, hidaha iyo dhaqanka) .

## Ujeeddo Istiraatiijiga ah ee 2aad:

In la kobciyo aqoonta, garashada iyo jeclaysiga dhallinyaradu u hayaan diintoodaba taariikhdooda iyo. dhaqankooda,

*Waxqabadyada Mudnaanta leh*

1. In bulshada iyo waalidiintu ku booriyaan in dugsiyadu abaabulaan oo hirgeliyaan barnaamij dhaqameedyo ka kooban hal abuur, murti iyo fan suugaaneedyo
2. In la sahmiyo lana horumariyo mashaariic shaqo abuur oo la xiriira dhanka –dhiirigelinta fanka,dhaqanka iyo hiddaha.
3. In la dhiirigeliyo abuurista Maktabado laga furo magaalooyinka
4. In la sameeyo Madxaf Qaran oo Puntland yeelato.
5. In la bilaabo lana dhiirigeliyo dabbaaldegyo dhaqameedyo sannadle ah, sida kan Asbuuca Dhaqanka heer Qaran'.

## 4.6 QAAB-NOLOLEED SUUBAN

Caafimaadka iyo dabeecadaha qaab-nololeedyada kala duwani waa arrin welwel badan ku haysa dhallinyarada reer Puntland gabdho iyo wiilalba. Guud ahaan, adeegga caafimaad ee dalka waa mid liita. Sida la qiyaasay xilligii dagaalada sokeeya socdeen in 90% kaabayaashii caafimaadku ay burbureen badankoodna wixii qalab iyo agab yaalley la biliqaysay. Intaa waxa dheer in dhakhaatiirtii iyo shaqaalihii caafimaadku ay kala yaaceen oo midba meel u qaxay, Sidaa darteed, Siyaasadda Caafimaadka iyo Nafaqada dawladda Puntland waxa uu ka tarjumayaa adeegga caafimaad ee imminka dalka ka jira, kaasoo baaxadda waxtarkiisa lagu sifayn karo mid ku tiirsan deeq dibadeed una dhisan qaab xaalada dedgdeg ah. Mar haddii xaaladda adeegga caafimaad ee dalku sidaa tahay, way adag tahay in la helo adeeg caafimaad oo dhallinyarada gaar u ah, iyadoo haddana la ogyahay in caruurta iyo da'yartu yihiin kuwa ugu nugul bulshada inteeda kale, waxayna u sii nugul yihiin cudurada guud ahaan ka jira dalka, kuwa galmada laysku qaadsiiyo, dhibaatada qaad cunista, mukhaadaraadka iyo maandooriyaha iyo weliba kufsiga iyo dhibaatooyinka la xiriira

Siyaasadda Dalka ee Horumarinta Dhallinyaradu waxay si buuxda u taageersan tahay aragtida iyo waxqabadyada lagu talabixiyey ee ku xusan Siyaasadda Caafimaadka Dalka ee loogu talagalay inay hagto hirgelinta barnaamijka caafimaadka dawladda Puntland oo dhan, taasoo soo baxday bishii Febraayo sannadkii 2007. Sidaa darteed Siyaasadda Horumarinta Dhallinyaradu waxay kaabaysaa midda caafimaadka gaar ahaan istiraatijiyadaha caafimaad ee khuseysa dhanka caafimaadka dhallinyarada.

Intii lagu jirey marxaladdii wadatashiyada ee dejinta siyaasaddaan horumarinta dhallinyarada qodobada xagga caafimaadka ee la xusay waxa ugu waaweynaa qaad cunista iyo in dadka qabatimay uu dhaxalsiin karto inay qaadan fayruska HIV/AIDS, iyo nafaqo darri la derista. Qorshaha Shanta Sono ee Hurmarinta Puntland waxa lagu sheegay in qaad cunistu ka mid tahay dhibaatooyinka ugu waaweyn ee ka jira dalka. Fayraska HIV/AIDS oo ku fida dalka wuxuu dib u dhac weyn ku yahay kororka caafimaad ee la gaarey tobankii sano ee tagtay. Inkasta oo heerka HIV/AIDSka Puntland uu hooseeyo marka loo eego dalalka dariska ah, haddana waa khatar saamayn weyn ku yeelan karta qaybaha wax soo saarka leh ee bulshada, sida gabdhaha iyo wiilasha dhallinyarada ah

**Arrimaha ugu daran** mawduucaan waxa weeye: –

- Guud ahaan heerka caafimaadka bulshada oo liita
- Qaad cunista iyo maandooriyaha oo aad u sarreeya
- Wax soo saarka shaqo ee shaqaalaha caafimaadka oo aad u hooseeya
- Isticmaalka adeegyada caafimaadku oo hooseeya

- Khatarta faafista HIV/AIDS oo sii kordhaysa
- Tirada cudurada la daaweyn karo oo dalka aad ugu badan, sida shubanka, cudurrada saableyda ku dhaca, sida Qaaxada iwm
- Barnaamijyada baraarujinta caaafimaadka iyo ka hortagga oo aad u kooban
- Heerka Gudniinka Fircooniga Gabdhaha oo sarreeya
- Qarinta iyo faquuqista ka dhanka ah dadka qaba HIV/AIDS
- Heerka nafaqodarida oo sarreeya
- Wax quudin ahi kama jiraan dugsiyada intooda badan
- Kufsiga iyo xadgudubyada loo geysto dumarka
- Guur Horaadka
- Wacyi galin xumi ku saabsan hababka ka hortegista cudurrada faafa
- Goobaha caafimaadka oo ku yaalla meelo fog fog
- Xog uruurin, cilmibaaris iyo lafaguris dhab ah laguma samayn xaaladaha caafimaad ee dhallinyarada haysta
- Qiimaha adeeegga goobaha Caafimaadka
- Dabeecado qallafsan oo dhaqan iyo kuwo bulsho
- Dadka soo barakacay iyo reer miyiguba adeeg camaafimaad ma haystaan
- Shaqaale aan aqoon lahayn una tababarayn shaqooyinka ay hayaan, sida farmashilayaasha
- Maaraynta wasakhda iyo bullaacadaha magaalooyinka oo liidata
- Dhakhaatiir Dhaqameedyo
- Tayada daawada oo liidata ama dhacday
- Biyaha nadiifta ah ee la cabbo oo aad u yar
- Adeeg Caafimaad oo Asaasi ah oo macno lihi ma jiro
- Jirrooyinka/xanuunnada ku dhaca dhimirka

## Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 1-aad:

In loo sahlo dhammaan dhallilnyaradu inay heli karaan xogta saxda ah, aqoon barasho iyo adeegyo talooyin ka siiya xaaladaha caafimaad ee dhallinyarada ay aadka ugu baahan yihiin

*Waxqabadyada Mudnaanta leh:*

In dhallinyarada loo sameeyo goobo adeeg caafimaad oo ay ka helaan xogta macluumaadka ay uga baahan yihiin ka hortegista cudurrada, aqoon waxbarasho iyo talabixin sax ah oo ku saabsan caafimaadka xubnaha taranka, isticmaalka maandooriyaha, kufsiga, iyo xanuunnada galmada lagu kala qaado.

In la ballaariyo adeegyada nafaqaynta iyo quudinta ee dugsiyada Hoose dhexe

Wacyigelinno abaabulan oo ku saabsan joojinta fal-dhaqameedyada waxyeellada leh sida gudniinka gabdhaha oo kale

In la diyaariyo xog iyo warbixinno istiraatiiji ah oo lagu soo bandhigo xaaladda caafimiaadka dhallinyarada iyo caqabadaha jira.

In la horumariyo qaabab adeeg caafimaad lagu gaarsiin karo da'yarta reer guuraaga ah iyo kuwa kale ee ku nool duruufaha qallafsan.

In la dhiirigeliyo dadaallada lagu yaraynayo gudniinka gabdhaha, shaqaaqooyinka qoyska, guur-horaadka tacaddiyada kale ee loo geysto hablaha yar-yar.

## Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 2-aad:

In Olole lagu qaado yaraynta qaad cunista iyo sigaar cabbidda.

*Waxqabadyada Mudnaanta leh*

1. In la qaado olole dhanka warbaahinta ah iyo barnaamijyo waxbarasho dhallinyarada laga wacyigeliyo dhibaatooyinka qaad cunista.
2. In dawladdu soo saarto sharciyo qaanuun lagu xaddidayo cunista qaadka iyo cabbidda sigaarka
3. In qaad cunista iyo sigaar cabbista laga mamnuuco dhammaan goobaha waxbarshada, xarumaha dhallinyarada iyo garoomada ciyaaraha.

## Ujeeddo Istiraatiijiga ah ee 3-aad:

In laga hortago lana ilaaliyo fidista fayraska HIV/AIDS isla markaana la qaado tallaabooyin lagu yarayn karo saamaynta dhinaca bulshada.

*Waxqabadyada Mudnaanta leh*

1. In la taageero gacana laga siiyo qorshayaasha ay dejisey hay'adda Qaramada Midoobey u qaabilsan HIV/AIDS ee (UNAIDS), isla markaasna la xoojiyo hawlaha ay xafiiska dawladda Puntland u xilsaartay la tacaalista fidista HIV/AIDS.
2. In si joogto ah loo ururiyo, la lafaguro loona baahiyo xogta iyo warbixinaha la xiriira ka hortegista fiditaanka HIV/AIDS.
3. In la tayo geliyo adeegyada laguna jiheeyo kuwa ugu nugul qaybaha bulshada, lagana taageero gaar ahaan dhinacyada ka hortagga, daaweynta iyo talosiinta.

4. In kor loo qaado tayada tababarada loo qabto dadka ka shaqeeya xarumaha caafimaadka dhallinyarada si ay adeeg tayo leh u gaarsiiyaan dadka ugu nugul.
5. In la qaado ololee liddi ku ah cambaaraynta iyo faquuqista lagu hayo dadka qaba xanunnka HIV/AIDS.
6. In dib u eegis iyo wax ka beddelis lagu sameeyo, qaanuunnada iyo shuruucda dawladdu ka soo saarto faquuqista iyo takoorista dadka qaba HIV/AIDS.
7. In la xoojiyo wacyiga, awoodda iyo xirfadaha dacwadda ee ururada aan dawliga ahayn, maamulada degaamada, culimada, gudoomiyaasha siyaasadda iyo kuwa bulshada si ay qayb libaax uga qaataan dadaallada loogu jiro ka hortegista iyo yaraynta fiditaanka HIV/AIDS.
8. In manaahijta dugsiyada waxbarashada toosan iyo kuwa dadbanba lagu daro casharo ku saabsan barashada HIV/AIDS.
9. In la xoojiyo hawlaha ururada dhallinyaradu qabtaan iyo xiriirintooda.

11-In la kordhiyo tirada xarumaha talosiinta iyo isbaarista, tayada adeegyada ay qabtaanna la xoojiyo

## 4.7 HORUMAR DHAXAL-GAL AH IYO DEEGAAN HABBOON

Waarista horumar la gaaro iyo saamaynta uu ku lahaan karo deegaanku waxay ka mid tahay arrimaha welwelka ku haya dhallinyarada Puntland. Wadatashiyadii iyo shirarka la soo qabtay waxay isku raaceen baahida loo qabo la socodka arrimaha ay ka mid yihiin Isbeddelka Cimilada Adduunka, Nabaadguurka Carrada, Kaydinta iyo beekhaaminta Biyaha, Isticmaalka Dhuxusha, xaalufinta dhulka kaymaha ah, dabargoynta bacaha, dhawrista khayraadka dhaxalgalka ah, iyo dariiq kasta oo lagu ilaalin karo deegaanka, Dhallinyaradu waxay garwaaqsan yihiin waxyeellada daaqsinta oo aan loo meel deyin, iyo u dhug-li'ida nabaadguurka carradu inay cawaaqib xumo ballaaran ku keeni doonaan wax soo saarka dhulka iyo nolosha bini-aadankaba

Heshiiska Caalamiga ah ee Dhallinyarada Afrika wuxuu ugu baaqayaa dawladaha Afrika inay qaadaan tallaabooyin iyo siyaasado lagu xaqiijinayo hirgelinta barnaamijyo horumar waara gaarsiin kara dhallinyarada iyadoo aan waxyeello la gaarsiin waxyaabaha dhaxalka u ah jiilalka dambe.

Arrimaha ugu daran ee Istiraatijaddani mudnaanta siinayso –

- Xaqaa'iqa Isbeddelka Cimilada Adduunka
- Dugsiyada oo aan lagu dhigin barashada cilmiga deegaanka
- Dabeecado wax-dumiya oo lagu hayo deegaanka
- Xaalufin Deegaan
- Burburin meelihi biyo qabatinka ahaa iyo khayraadka badda
- Dhibaatooyinka Bacaha suuqa looga soo adeegto
- Xiisaha ballaaran ee dhallinyaradu u hayaan deegaanka
- Gubista Dhuxusha iyo Baabi'inta dhirta.

## Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 1-aad:

In kor loo qaado aqoonta iyo wacyiga dhallinyarada Puntland u leedahay dhawrista degaanka

Waxqabadyada Mudnaanta leh

1. In lagu daro manhajka dugsiyada casharo ku saabsan barashada dhawrista deegaanka.
2. In tababarada macallimiinta lagu daro casharo ku saabsan barashada dhawrista deegaanka.
3. In la diyaariyo ololayaal wacyi-gelinta xagga warbaahinta oo ku saabsan dhallinyarada iyo dhowrista deegaanka iyo wax ka qabadkiisa
4. In lagu dhiirigeliyo dhallinyarada inay sameeyaan riwaayado iyo barnaamijyo madadaalo oo wax ka tara ilaalinta iyo dhawrista deegaanka

## Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 2-aad:

In dhallinyarada lagu boorriyo sidii ay dowr firfircoon iyo mid hogaamineed uga qaadan lahaayeen ilaalinta deegaanka.

*Waxqabadyada Mudnaanta koowaad leh:*

1. In la sameeyo maalin dhallinyaradu u dabbaal-degaan xuska maalinta ilaalinta deegaanka, abaalmarinna la guddoonsiiyo shaqsiyaadka dhallinyarada ah ee hawlo wax ku ool ah ka qabtay ilaalinta deegaanka.
2. In dhallinyarada lagu boorriyo inay abaabulaan mashaariic dhiirigelinaysa in bulshadu dabbakhaan falal-dhaqameedyo baxnaano u ah deegaanka.
3. In la caadeysto hawl qabadyo bulsho iyo iskaa wax u qabso oo looga gol leeyahay in lagu dhawro deegaanka.

4. In dhallinyarada reer Puntland helaan fursado iyo xubno u matala golayaasha iyo shirarka caalamiga ah ee looga hadlo wax ka qabashada xaalufinta deegaanka sida golaha MENA iyo kuwa la midka ah.
5. In la agaasimo golayaal dhallinyaro oo heer gobol iyo heer qaran ah oo u ololeeya waaritaan horumarka iyo deegaanka.
6. In la abuuro ilo shaqo abuuris oo kala duwan sida Dib-u-xoolaynta alaabooyinka la tuuro, bacaha oo wax kale laga farsameeyo, dib u dhirayn iyo xafidista waxyaabaha dhaxalgalka ah.

## 4.8 JINSIGA & XUQUUQAL INSAANKA

Dawladda Puntand Dastuurkeeda waxay ku qeexday Xuquuqda Haweenka, dastuurku wuxuu hubinayaa in haweenku ay u madax bannaan yihiin habka dhaqan-dhaqaale iyo xuquuqda siyaasadeed ay shareecadda Islaamku u jideysay, Yoolka Horumarinta muddada 5-ta sanno ee horumarinta Puntand wuxuu siinayaa Haweenka fursaddo sinnaan iyo horumarin iyo in ay ku noolaadaan xurmo, lagana reebo wixii wax u dhimaya isla markaana awood u siinaya in ay ka qayb galaan horumarka dhismaha bulshada.

Dastuurku wuxuu, kale oo caddeynayaa mudnaanta Xuquuqda Carruurta Agoomaha, Naafadda iyo kuwa Dhimirka la', sinnaan bulsho, Xoriyadda Diinta, Xoriyadda Hadalka, Xaqa coddaynta iyo xuquuqda shakhsiyadeed.

Sida ku qeexan Dastuurka, siyaasadda Dhallinyaraddu waxay si xoog leh ugu qareemaysaa dhallinta rag iyo haweenba in ay helaan wax kasta oo ay xaq u leeyihiin. Gaar ahaan, Ansixinta iyo fulinta Axdiga Xuquuqda Carrurtu waa qodob asaasi ah ay ku talinayso Siyaasadda Dhallinyada ee Qaranku. Tan labaad, siyaasadan waxaa ku jira qodob caddaynaya xuquuqda iyo waajibaadka dhallinyarada (eeg cutubka 7aad).

Arrimaha ugu daran e Mudnaanta istaratijiyadeed leh:

- Aqoonsi la'aanta Axdiga Xuquuqda Carruurta.
- Kala faquuqidda jinsiga, eexashada iyo naanaysta.
- La'aanta xuquuq waxbarasho iyo wacyigelin.
- Faquuqidda iyo takooridda dadka HIV la il-daran.
- Faquuqidda dadka laga tirada badan yahay iyo dhallinta naafada ah.
- La'aanta dhallinta ee Xuquuqdooda siyaasadeed.

- Baahida isu dulqaadashada iyo isxurmaynta
- Guurka Da'yarta ee deg-degga ah
- Haweenka oo aan haysan goobo ay ku kulmaan

**Ujeeeddo Istiraatiijiga ah ee 1-aad:**

In la baaro lana caddeeyo arrimaha hortaagan una diidaya gabdhaha in ay helaan xuquuqdooda caafimaad, hal-abuurid, waxbarasho iyo fursado shaqo siineed.

Waxqabadyada mudnaanta leh

1- Cilmibaaris lagu sameeyo u sinnaanta rag iyo dumar ee siyaasadda iyo adeegyada la xiriira caafimaadka, hal-abuurka iyo fursadaha shaqo siinta.

2- In la hirgeliyo waxqabadyo cayiman oo xoojinaya ka qaybgalka hablaha yar-yar xagga:

  - Adeegyada caafimaadka.
  - Waxbarashada Dugsiyada Sare iyo Jaamacadaha
  - Ciyaaraha, waxqabadyada xarumaha dhallinta, iyo
  - shaqaalaynta

3- Samayn Sharci lid ku ah Gudniinka Fircooniga iyo Guurka Gabadhaha aadka u yar-yar.

**Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 2-aad:**

In lagu taageero dhallinyarada Puntland sidii ay u garan lahaayeen waxa xaqa ay u leeyihiin iyo waajibaadka lagu leeyahay, iyo sidii ay u fulin lahaayeen.

Waxqabadyada mudnaanta leh:

1. Mudnaan siinta ansixinta Axdiga Xuquuqda Carruurta.
2. In la kobciyo waajibaadka bini-aadanimo isu soo dhoweeyn kara.
3. In manhajka dugsiyada lagu daro Xuquuqda Lamaanaha iyo xuquuqul insaankaba.
4. Qabashada kullamo fagaare ka hadal ee Xuquuqal isaanka iyo Lamaanaha ah oo heer gobol iyo mid qaranba ah.
5. In la joogteeyo dib u fiirinta iyo cusboonaynsiinta sharciyada lagu ilaalinayo carrruurta iyo dadka dhallinta yar.
6. Dheerigelinta iyo taageeridda waxqabadyada dadka yaryar ku reebaya dulqaad iyo is xushmayn.

## 4.9 BARASHADA WADANIYADDA

Waxbarshada madaniga ah waxay la xirriirtaa wacyigelinta xuquuqda iyo mas'uuliyadaha muwaadinka, waxaa yar waxqabadyada waxbarshada madaniga ah ee bulshada dhexdeeda ka jira. Siyaasaddani waxay muwaadinka siinaysaa habka wacyigelinta salka u ah ee horumarinta dhalinta da' yarta ah, si ay u noqdaan xubno firfircoon oo ka qayb qaata dimuqraadiyeynta Puntland

Waxay awood siinaysa Siyaasadda Waxbarashada Puntland ee lagu xusay "doorka ugu fiican ee nidaamka waxbarasho ka qaato wadaniyada iyo mas'uuliyadda madaniga ah ee Puntand.

Arrimaha ugu daran ee la xiriira waxbarshada madaniga ah oo ay ku jiraan:

- La'aanta waxbarasho muwaadinnimo/qiyam oo ka mid ah manhajka dugsiyada.
- La'aanta qalabka/agabka waxbarashada arrimaha madaniga.

**Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 1-aad**:

In la sameeyo manhajka waxabarasho madaniga ah oo ku habboon dugsiyada iyo bulshadaba oo leh agabkii iyo waxqabadkii wacyi gelineed

Waxqabadyada mudnaanta leh:

1. Samaynta iyo hirgelinta qayb ka mid ah manhajka Dugsiyada waxbarashada madaniga ah.
2. Abuurita fursado ay dhallinyaradu kaga qaybgalaan kulamada laga hadlayo muwaadinnimada.
3. Xoojinta warbaahinta saxaafadeed ee la xiriirta muwaadinimada.
4. Taageerida banaamijyada xoojinaya mabaa'diida iyo waxqabka muwaadinka qabanayaan dhallinyaradu ee heer bulsho iyo mid qaranba.
5. Qaadashada waayo-aragnimadii laga helay wadamada Libya, Tunisia, Egypt, Jordon iyo Bahrain ee ah in Dhallinyarada loo sameeyo Gole wakiilo.

## 4.10 SOCDAALKA & QURBA JOOGGA

Puntland waxa soo food saaray dad badan oo ka soo qaxay faqriga, shaqo la'aanta iyo culayska dagaalada joogtaada ah ee ka jira koonfurta soomaaliya. Qaarkood waxay si aan sharci ahayn u soo baxeen khatarna u soo galeen in ay helaan nolol fiican. Dhallinyaro badan oo aqoon sare leh ee wadanku ka faa'iidsan lahaa ayaa ka mid ah. Waxaa u baxa Wadanka Yamen dhallinyaro

da'yar oo tahriib ah, khatartaasina waxay u keentay dhallinyaro badan in ay naftoodii ku waayaan. Sababta asaasiga ee keentay tahriibtan arrimaha la xiriiraha waxqabadyada la soo jeediyey ee 4.3 (Hub ka dhigista, nabadgelyada) 4.4 waarida habnololeedka dhalinta iyo shaqaalaha) ee sare.

Qurba joogtu waxay ku fadhidaa tiir muhiim ah oo xagga dhaqaalaha iyo dib u dhiska Puntland, Qurba joogta Soomaaliyeed waxay hadda kor u dhaafeen Hal Milyan, intooda baddanina waxay caawiyaan dadkoodii iyo dalkoodaba.

Isticmaalka dhaqaalaha iyo kan farsamo ee ay ku deeqaan qurbajoogtu waxay u baahan tahay istaraatijiyad iyo xiriirin taxadar leh. Si kastaba ha ahaatee, dhaqaalaha qurbajoobta waxa barbar socda dhibaatada dhaqan xumida ah ee caruurta ay dhaleen u keento bulshada marka ay dalka yimaadaan, una baahan in laga badbaadiyo dhallinta dhaqankaas wuxuuna keeni kara dhibo dhinac hormarinta

**Arrimaha u daran ee la xiriira tahriibta iyo qurba joogta:**

- Asalka ama sababaha keena tahriibta
- Qaxa aqoonyahanka ama maskaxda Dalka
- La'aanta fursado shaqo
- Qurbajoogta – Wax soo saar farsamo iyo dhaqaale, isla-xiriirinta fursadaha, dhaqan guur, maalgelin aan habboonayn.
- Fursado fiican oo xiriir caalami ah iyo isku xirnaan

**Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 1-aad:**

In diiradda la saaro sidii lagu heli lahaa waddooyin-nololeed kale oo u furan dadka tahriibta gala.

Waxqabadyada mudnaanta leh.

1. Fulinta qorshe-hawleedka qaran ee shaqaalaynta dhalinyarada puntland
2. Horumarinta xirfado iyo tababarro shaqo oo ku habboon fursadaha suuqyada ka jira.
3. Baarista da'yarta sidii ay u hindisi lahaayeen fursado mustaqbal oo kala duwan

**Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 2-aad:**

Abaabulka awoodda dhaqaale iyo dadba ee qurbajoogta

Waxqabadyada mudnaanta leh:

1. In shirar sannadle ah loo qabto qurba joogta xooggana lagu saarayo waxqabadyada dhallinyarada.
2. In lagu dhiirigeliyo dhallinta qurbajoogta reer Puntland in ay dalka ku soo noqdaan si looga faa'iideysto aqoonta iyo xirfadaha ay dibadda ku soo barteen.
3. U bandhigidda qurbajoogta Sanduuqa Horumarinta Siyaasadda Dhallinyarada Puntland iyo ku dhiirigelinta sidii ay uga qayb qaadan lahaayeen.
4. Samaynta Website ay leedahay dhallinyarda Puntland iyo qurbajoogoodu.

## 4.11 TEKNOLAJIYADA WARGUDBINTA, ISGAARSIINTA IYO ISU-FURRAANTA CAALAMKA

Siyaasadani waxay si xoog leh u taageeraysa in ay dhallinyaradu baahiyahooda uga faa'iidaystaan koritaanka farsamada qaybta Tignoolajiyada ee Puntland. Dadka yar-yar ee adduunka maanta oo ay ka mid yihiin kuwa Puntland waa muhiim inay ka qayb galaan tignoolajiyada. Koboca warshadaha isgaarsiintu waxay ku caan noqdeen kuwa shaqo abuur awoodna u siinaya in uu helo tababaro iyo shaqo, kuna xiraya dadka yar-yar in ay baahidooda la wadaagaan caalamka si ay u noqdaan curiyayaal/hal-abuurayaal, weli xasaasiyad badan baa dhinaca dhankaa ka jirta.

**Arrimaha ugu daran ee mudnaanta leh:**

- La'aanta Siyaasad ICT.
- La'aanta ICT-ga ku wajan Manhajka Dugsiyada.
- La'aanta awooda helitaanta ICT.
- Muhimmadda shaqo abuuriseed ee ICT yeela karto.
- Internet-ka iyo la xiriirka adduunka, iyo saamaynta uu ku yeelan karo dhaqanka
- Barnaamijyada raadiyaha ee caanka ah iyo warbaahinta dhallinyarada

**Ujeedda Istiraatiijiga ah ee 1-aad:**

In muhimad gaar ah la saaro ICT laguna daro horumarinta dugsiyada waxbarashada ee la habaynayo

Waxqabadyada mudnaanta leh:

1. Samaynta Manhaj ku habboon oo lagu baranayo ICT ee heer kasta oo waxbarashada dugsiyada
2. Diyaarinta iyo hirgelinta qorshe, dugsiyada la siinayo qalabfarsamo ICT oo ku habboon laguna dhigayo.

**Ujeedda Istiraatiijiga ah ee 2-aad:**

In Xoogga la saaro ICT loona arko in ay ka mid tahay furayaasha Shaqo abuurita dhallinyarada

Waxqabadyada mudnaanta leh:

1. In la sameeyo cilmibaaris lala kaashanayo ILO ee ku saabsan hormarinta shaqo abuurka ICT.
2. Tababarro ku habboon Horumartin xarumaha xirfadaha ICT ee lala kaashanayo shirkadaha gaarka loo leeyahay.
3. Dhiiri-gelinta dhallintu in ay iskood uga shaqeystaan xirfadaha ICT.
4. Samaynta Internet ee ku dhex yaal Xarumaha dhallinyarada ee magaalooyinka.

**Ujeeddada Istiraatiijiga ah ee 3-aad**

Xoojinta waxqabadyada iyo hal-abuurka la xiriira dhallinyarada iyo warbaahinta.

Waxqabadyada mudnaant leh:

1. Ballaarinta fursadaha dhallinyaradu kaga qaybgalayaan barnaamijyada warbaahinta
2. Taageeridda dhallinyarada in ay shaqooyin ka helaan saxaafadda nooc kasta oo ay leedahay warbaahintu.

# Cutubka 5aad

## Kooxaha ah Yoolka Mudnaanta Kowaad:

Siyaasadda Dhallinyarada Dawlada Puntland waxay mateshaa aragti iyo heykal waxqabad lagu gaarayo horumarinta dhallinyarada reer Puntland dhammaantood. Hase ahaatee waxaa la garawsaday inay jiraan ilaa 8 qaybood ama kooxood oo ah noocyada dhallinyarada u baahan in xaaladdahooda il gaar ah lagu hayo, isla markaana la hubiyo inay si buuxda uga faa'iideystaan waxqabadyada la qorsheeyey. Qaybahaas ama noocyadaas dhallinyarada aan ka xusnay waxaa ka mid ah:

- Dhallinyarada reer guuraaga ah;
- Dhallinyarada lixaadkoodu dhimman yahay;
- Dhallinyarada qabta xanuunka AIDS-ka;
- Gabdhaha da'yarta ah;
- Dhallinyarada Shaqada la'.
- Dhallinyarada Beelaha la faquuqo;
- Dhallinyarada aan haysan fursado waxbarasho
- Dhallinyarada dadka barakacay.

# Cutubka 6aad

## Fulinta Siyaasadda iyo Wada-socodsiinta

Siyaasaddan Horumarinta Dhallinyarada Puntland waxay ku dhisan tahay qodobbo mabda'iyan la aaminsan yahay

1. Mabaadida horseedka u ah iskaashiga iyo wax wadaqabsiga, garwaaqsiga baahida loo qabo iskaashiga dhammaan dhinacyada ku lug leh horumarinta dhallinyarada, kuwaasoo ay ku jiraan wasaaradaha dawladda, ururada bulshada rayidka ah, ururada horumarinta caalamiga ah, ganacsatada, iyo ururada dhallinyarada ah.
2. Mabaadi'da asaasiga u ah hannaanka horumarka isku dhafan- in awoodda la saaro isku dhafnaanta xagga wax wada qabsi ee qaybaha kala duwan iyadoo la adeegsanayo dariiqooyin waxqabad oo kala duwan oo lagu horumarinayo barnaamijyada dhallinyarada iyo weliba in hawlaha dhallinyarada lagu dhex milo waxqabadyada bulshada kale ee kala geddisan, iyo weliba qaybaha siyaasadda waxqabad ee barnaamijyada kala duwan.
3. Siyaasaddani waxay aqoonsan tahay baahida loo qabo xaqiijinta isticmaalka hufan ee khayraadka jira oo awalba iska yaraa.

Iyadoo laga duulayo arintaan, Siyaasadda dhallinyarada Puntland waxay soo jeedineysaa:

1. Marka dawladda Puntland ay ansixiso Siyaasadda Dhalinyarada Dalka, waxa la dejin doonaa **Qorshe-Howleedka Dhallinyarada ee Heer Qaran**, kaasoo si faahfaahsan u qeexi doona*"waxa la qabanayo, cidda qabanaysa, siday u qabanayso, iyo goorta la qabanayo.*

2. **Kooxda Xiriirinta Hirgelinta Siyaasadda Dhallinyarada Dalka** ayaa la samayn doonaa si ay u hirgeliyaan siyaasadda. Kooxdaan hawl wadeenka ah, waxaa magacaabi doona wasaarada dhalinyarada waxayna ka koobnaan doonaan xubno ka kala socda dhammaan hay'adaha kala duwan ee ku shaqada leh hawlaha dhallinyarada. Dawladda Puntland waxa looga baahan yahay inay u qoondayso dhaqaale waxqabad.. Koox-hawleedku waxay hubin doonaan isu-duwista iyo wadaxiriirinta hawlaha socda, kala duwistooda iyo qaybinta habboon.

3. **Dalladda Isku-xirka Dhallinyarada** waxay iyana u xil saarnaan doontaa sidii xiriirada, golayaasha iyo ururada dhallinyarda kala duwan ee dhammaan bulshada rayidka ahi uga qaygeli lahaayeen barnaamijyada horumarinta dhallinyarada. Tallaabadaasi waxay xaqiijinaysaa in hay'adaha aan dawliga ahayni awood u yeeshaan iskaashi buuxa iyo cod qura oo ay ku dhaqan geliyaan ballanqaadyada waxqabad ee ku wajahan hirgelinta siyaasadda dhallinyarada. Marka lagu daro samaynta fursadaha xog is-weydaarsiga iyo wadaagista warbixinaha, xiriirada ururada dhallinyaradu waxay garwadeen u noqon karaan xaquuqaha dhallinyarada iyo ururinta dhaqaale wax lagu qabto.

4. **Waa in wasaarad waliba magacawdo wakiil u magacaaban hawlaha dhallinyarada-** waana in jagadaasi loo magacaabo qof u heellan xiriirinta waxqabadyada wasaaradda ee ku wajahan hawlaha dhallinyarada, isagoo warbixintaaas iyo wixii talo ahba u gudbinaya wasaarada dhalinyarada si ay ugu darsato qorshe hawleedka.

5. **Abuurista Sanduuq u gaar ah Horumarinta Dhallinyarada Dalka** kaas oo soo jiidan kara, maarayn kara, dhinacyada dawladda, hay'adaha caalamiga, bulshada ganacsatada ah, iyo qurba joogtaba kana keeni kara jaangooyo dhaqaale oo lagu aruuriyo sanduuqa dhallinyarada. Guddi sare oo ka koobban shaqsiyaad dadka dhexdooda xurmo ku leh oo ay wasaarada dhalinyaradu soo xushay waa inay maamulaan dhaqaalaha Sanduuqa Dhallinyarada. Shaqada ugu muhiimsan ee sanduuqa dhallinyaradu qaban doono waxaa ka mid ah inuu ka tala bixiyo sida loo kala hormarinaayo waxqabadyada ku wajahan fulinta iyo hirgelinta Siyaasadda Horumarinta Dhalliyarada Dalka. Dhallinyarada qudhoodu waa inay xubin ku lahaadaan Guddiga Sare

6. In la Sameeyo **Kooxda Dabagalka Siyaasadda Dhallinyarada Dalka.** Muhiimadda Kooxdaani waa inay kormeer iyo qiimayn joogta ah ku samayso hirgelinta Siyaasadda Dhallinyarada Dalka. Dhallinyarada reer Puntland waa inay kaalin firfircoon ka noqdaan kooxdan dabagalka iyo Qiimaynta siyaasadda dhallinyarada dalka

Ugu dambayntii, waxa la soo jeedinayaa in muddada ku dhaqanka Siyaasaddani noqoto 4 sano, inta aan la laalinin ku dhaqankeedana laga fikiro dejinta beddelkeeda

# Cutubka 7aad.

## Xuquuqaha iyo Waajibaadka Dhallinyarada

Dhammaan Dhallinyarada Puntland waxay leeyihiin xuquuq muwaadinnimo iyo waajibaad laga rabo inay gutaan kuwaasoo ku qeexan *Dastuurka Dawlada Putnland,* kuwaas oo ay ku jiraan xuquuqul aadanaha iyo sharafka qofka, u sinnaanta sharciga loo siman yahay, xaquuqda noolaanshiyaha mawaadinka, xoriyadda qofka iyo amniga, shaqada, xaquuqda abaabulista shirarka iyo mudaaharaadyada nabada ah, xaquuqda waxbarashada, dhawrista qoyska, daryeelka bulshada, dhaqaalaha iyo xuquuqda ka qaybgalka iyo samaynta ururo bulsho iyo xisbiyo siyaasadeed oo sharciyeysan

Siyaasadda Dalka ee Horumarinta Dhallinyaradu waxay garwadeen iyo afhayeen u tahay in dhammaan dhalliyaradu, iyada oo aan loo eegin da', jinsi, fayaqabka, iyo marxaladahooda dhaqaale iyo degaan, waxay xaq u leeyihiin inay si buuxda ugu raaxeystaan:-

- In da'yaraantooda awgood ay xor ka yihiin nooc kasta oo dhibaatayn ah, colaadaha, dagaallada, dhiigmiiradka iyo tacadiyada nooc ay yihiinba.
- Inay helaan waxbarasho micno leh iyo fursadaha shaqo-siinta
- Caafimaad tayo leh iyo
- Inay ka qayb galaan go'aan ka gaarista arimaha sida tooska ah ee khuseeya noloshooda

Ugu dambayntii, Siyaasadda Dalka ee Horumarinta Dhallinyaradu waxay ugu yeereysaa dhallinyarada, gabdho iyo wiilalba inay si xilkasnimo leh u gutaan mas'uuliyadaha iyo hawlaha u yaal si loo gaaro nolol ku salaysan nabad, barwaaqo iyo daryeel wanaagsan. Arimahaas waxay dhalliyaradu ku gaari karaan:-

- Quweynta diinta Islaamka iyo barashada Qur'aanka kariimka;
- Xushmaynta dhaqanka, caadooyinka suubban iyo midnimada Soomaaliyeed
- Garwaaqsashada xaqsoorka dheddig iyo labka iyo xuquuqul isnaanka
- Ku dadaalista sidii qofku ku naftiisa u horumarin lahaa
- Xushmaynta sharciga iyo kala dambaynta iyo hantida muwaadiniinta kale

- U dhug lahaanshaha iyo ku dhaqanka dhaqan-nololeedyada hufan
- Taageerista xubnaha bulshada kuwooda nugul iyo kuwa la faquuqo, iyo joojinta nooc kasta oo faquuqis ah.
- Ilaalinta iyo dhawrista deegaanka iyo;
- In si firfircoon looga qaybgalo horumarinta bulshada iyo qaranka

**Gabo-gabadii,** Siyaasaddan Horumarinta Dhallinyarada Puntland waxay reer Puntland oo dhan ugu yeereysaa–

- In la ixtiraamo dowrka dhalliyaradu ku leehiyiin horumarinta bulshada iyo dalka;
- In dhallinyarada la tuso dhaqan iyo shaqsiyad fiican oo ay ku daydaan; in dhallinyarada laga taageero dhinacyada diinta, garashada, dhaqanka, dareenka maskaxeed iyo wanaajinta koritaanka jir ahaaneed ee da'yarta wiilal iyo gabdhaba
- In fursad siman la siiyo dhallinyarada iyadoon loo eegin jinsigooda
- In dhallinyarada laga saacido siday u gaari lahaayeen horumar la taaban karo iyo;
- In dhallinyarada lagu booriyo sidii ay kaalin firfircoon uga geli lahaayeen dhinac walba oo wax ku biirinaya horumarinta nolosha reer Puntland..

# Gaba-gabo

Dhallinyarada Puntland waxay ku nool yihiin duni is bed-beddel badan, Dhallinyaradu waa qaybta ugu muhiimsan qaybaha kala duwan ee bulshada, isla markaa dhallinyaradu waa kuwa ugu nuglaanshiyo badan marka laga eego xagga shaqada, caafimaadka, colaadaha, iyo saamaynta ay ku yeeshaan waxyaabaha ka socda dunida daafeheeda. Intii ay socotey dejinta Siyaasaddan Horumarinta Dhallinyarada Puntland, dhallinyaradu wiilal iyo gabdhaba waxay si cad u tilmaameen caqabadaha hortaagan iyo dhibaatooyinka ka haysta siday uga qaybgeli lahaayeen dib u dhiska Puntland, Dhibaatooyinka iyo caqabadaha waxaan ka xusi karnaa:-

- Waxaa aad u kooban adeegyada asaasiga u ah horumarinta dhallinyarada, sida adeegyada waxbarashada,shaqo-siinta, caafimaadka iyo ciyaaraha;
- Dadka waaweyni ma xushmeeyaan fikradaha iyo dowrka dhallinyarada
- Ka qaybgalka dhallinyarada ee dejinta siyaasadaha horumarinta bulshada iyo fulintoodaba oo aan jirin
- Qorshe dejinta iyo fulinta barnaamijyada horumarinta dhallinyarada oo ah kuwo aad u tayo xun.
- Wasaaradaha dawliga ah oo waxqabadyadoodu aaney muhiimad siin arimaha khuseeya dhallinyarada, iyo
- Iyadoo aanayba jirin siyaasado iyo xeerar qaran oo ku wajahan danaha dhalinyarada.

Iyadoo ay jirto doonista ay dhallinyaradu doonayaan inay kaalin muuqata ku yeeshaan dejinta iyo hirgelinta siyaasadda iyaga ku wajahan, ayey haddana doonayaan in dowrka ay doonaayan uusan ahayn mid ku eg ra;yi ku biirin keliya balse uu noqdo ka qaybgal ficil xaqiiq ah, ka dhabaynta ballanqaadkaasina waa mid u baahan abaabulis xoog badan.

Siyaasadda Dhallinyarada Dalka dejinteedu waxay ahayd qaybtii ugu fudud hawlihii la qabtay, balse culayskeedu waa sidii loo fulin lahaa.

# Mahadnaq

**Samaynta iyo Soo Saarist Siyaasadda Dalka ee Horumarinta Dhallinyarada waxaa suurta geliyey ka qaygalka iyo wax ku biirinta dad badan oo kala duwan. Gaar aahaan, kuwa aan hoos ku magacaabi doonno dowrkii ay ka qaateen dejinta siyaasaddan wuxuu ahaa mid lama illaawaan ah**

**UNICEF**

- Mr Jairus Ligoo, Madaxa Barnaamijka Horumarinta Da'yarta iyo Ka qaybgalka ee xafiiska hay'adda UNICEF Somalia-Nairiobi
- Mr Kamal Nidam Adan, Madaxa waaxda Horumarinta Da'yarta iyo Ka qaybgalka ee xafiiska hay'adda UNICEF Somalia-Boosaaso

**Golaha Caalamiga ah ee Siyaasadda Dal ee Hurumarinta Dhallinyarada (ICNYP)**

- Mr Peter Kenyon (Project Manager), Australia
- Mr Kamel Nabulsi, Jordan
- Mr David Wilson, New Zealand
- Ms Rana Taher, Jordan

**Wasaaradda Shaqada , Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Cayaaraha**

- Dr. Abdiweli Xirsi Cabdulle, Wasiirka Wasaaradda Shaqada, Dhallinyarada iyo Sportiga ee Dawladda Puntland
- Mudane. Cismaan Cawad Cali Wasiirku xigeenka Dhallinyarada iyo Ciyaaraha ee Dawlada Puntland
- Mudane. Siciid Daahir Maxamuud Wasiirku xigeenka Shaqada iyo Shaqaalaha ee Dawlada Puntland
- Mr Ahmed Hassan Bile, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda
- Mr Hassan Mohamed Isse, Agaasimaha Waaxda Dhallinyarada ee Wasaaradda

**Wasaaradda Harumarinta Haweenka & Arimaha Qoyska**

- Murwo. Asha Gelle Dirie, Wasiirka Wasaaradda Haweenka iyo Arimaha Qoyska-Dawladda Puntland
- Ms Saido Hussein Ali, Agaasimaha Guud ee wasaaradda

**Xubnaha Guddigii Hawl-wadeennada Gobollada**

**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Farole)**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

# Cutubka 1aad:

# Hordhac

Qorshaha Shanta Sano ee Horumarinta Puntland 2007 – 11 wuxuu sawir kooban ka bixinayaa xaaladda dhallinyarada Puntland ku sugan tahay isagoo isla markaana si cad u tilmaamaya baahida loo qabo samaynta Siyaasadda Horumarinta Dhallinyarada Dalka – *Kumanaan ka mid ah dhallinyarada ku nool Puntland ayaa ah kuwo ka soo laabtay xeryaha qaxootiyada ee ku yaal waddamadaa diriska ah, ama imminkaba ku sugan xeryaha dadka soo barakacay dalka gudihiisa iyo kuwo kale oo iyaguna ka qaybgalay ciidamada iyo maleeshiyaadka beelaha/qabaa'ilka, sidoo kale dhalinyaro badan ayaa kamid noqday burcad badeedka. Dhallinyaradaasi waxa haysata aqoon darro, shaqo la'aan, isticmaalka mukhaadaraadka iyo maandooriyaha, qaarkoodna waxayba la il-daran yihiin raadad xunxun oo colaadihii sokeeye maskaxdooda ku reebeen. Intooda badani waa cayr, mana aaney baran aqoon degaannada ay ku nool yihiinna ma aha kuwo ka saacida baahidooda dhaqaale. Dhibaatooyinkaas waxa keliya oo wax ka tari kara in loo sameeyo xirfado aqooneed iyo kuwo tababarro oo asaasi ah oo ay ku shaqaysan karaan Dhallinyaradu waxay kaloo khatar ugu jiraan cudurada lays-qaadsiiyo ee faafa sida kan HIV/AIDS xogta ay ka hayaan iyo wacyi gelin la'aan haysata, waayo adeegyo waxbarasho, caafimaad oo aan jirin, Sidaa darteed Dawladdu waa inay dejiso qorshe ay sida ugu habboon ugu adeegsan lahayd awoodda iyo muruqa dhallinyarada , taasina waa inay dawladdu dejiso siyaasadihii lagu hormarin lahaa dhallinyarada dalka.*

Mid ka mida natiijooyinka uu qorshaha shanta sano ahi soo jeediyey ayaa ah "*Dhexgelinta dhallinyarada hab-socodka horumarka qaranka,* taasoo macneheedu yahay samaynta" *Siyaasadda Horumarinta Dhallinyarada Dalka.*".

Siyaasadda Horumarinta Dhallinyarada ee Puntland waxay jawaab u tahay talo soo jeedintii qorshaha shanta sano ee horumarinta Puntland. Waa siyaasaddii ugu horeysey ee noocan oo kale ah, waxayna taabanaysa dhinacyo badan iyadoo la adeegsaday dariiqado isku-dhafan taasoo wajahaysa baahiyaha, danaha, rabitaanka iyo ka qaybgalka dhallinyarada Puntland.

Siyaasadda aan soo sheegnay waxay ka mid tahay ballanqaadkii dawladda Puntland samaysey taasoo muujinaysa sida ay dawladda uga go'an tahay ka mira dhalinta qorshayaasha mudnaanta kuwaad leh sida midka harumarinta dhallinyarada xilliga shanta sano ah.

Haddaan u dhigno siyaasadda dhallinyaradu inay noqon doonto sidan –

- Himilo Qaran ee wakhtiga fog;
- Xirmo ka kooban mabaadii'da laga duulayo;
- Qaab-hawleed dhinacyo badan kulmiya;
- Astayn istiraatijado muhim ah iyo waxqabadyada mudnaanta koowaad leh
- Baahiyaha, arrimaha, rajooyinka, iyo awoodaha dhallinyarada oo kooban;
- Aqoonsasho muhiimadda dhallinyaradu u leedahay nolosha bulshada iyo tan qaranka;
- Tilmaamis xaquuqaha iyo waajibaadka dhallinyarada
- Hannaan wadashaqayn iyo iskaashi dhexmara dhammaan dhinacyada ku hawlan barnaamijyada horumarinta dhallinyarada Puntland. Iyo
- Halbeeg lagu cabiro oo lagula socdo qiyaasta horumarka la gaarey inta uu le'egyahay.

Dhanka kale, waxaa lagu han-weynyahay in Siyaasadda horumarinta dhallinyarada dalku ay noqoto dhambaal rajo oo ay ku hirtaan dhallinyarada reer Puntland. Iyadoo ay xaqiiq tahay in dadka cimrigoodu ka hooseeyo 30 sano ay qiyaastii yihiin 70% dadka Puntland ku nool, ayaa haddana waxaan jirin wakiilo dhallinyarada matala ee ku jira golayaasha siyaasada, bulshada iyo dhaqaalahaba waayo waxa jira caqabado dhaqan ahaan loo aaminey iyo kuwo xagga sharciga ah.

Siyaasaddani waxay wax ka beddelysaa arintaa iyadoo tilmaamaysa waxqabadyada mudnaanta kowaad leh iyo weliba qaabab cusub oo ururada iyo hay'adaha kala duwani u wada shaqayn karaan

Samaynta siyaasaddani waxay ka dhalatay hawl labo sano ah oo ay iska kaashadeen hay'adda UNICEF iyo Wasaaradda Shaqada, Dhallinyarada iyo Ciyaaraha Puntland, Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Qoyska, tiro badan oo ka tirsan ururada bulshada rayidka ah. Waxaa intaa dheer, siyaadaddani waxay ka samaysantay talooyin iyo fikrado kala duwan oo dhaxal gal ah oo ay isu geeyeen tobanaan kun oo ka mid ah dhallinyarada ku dhaqan gobollada kala duwan ee Puntland, waxa la isu keenay dhallinyaro gabdho iyo wiilalba leh si ay talo ugu biiriyaan dejinta siyaasaddan maadaama ay ku wajahan tahay hagaajinta mustaqbalkooda. Tusaale ahaan, dhallinyarada ku dhaqan gobolka Nugaal waxay isku dubarideen hawlaha soo socda si ay micno badan ugu biiriyaan dejinta siyaaddan –

- Waxaa la booqday 40 dugsiyada gobolka ku yaal waxaana la waraystay ilaa 16,000 oo arday.
- 140 dhallinyaro ah ayaa ka qaybgalay doodo loogu magac daray *'U hawlgal gaarista riyooyinkaaga mustaqbalka'* kuwaasoo ka hawl gelaayey garoomada ciyaaraha xilliyada ay socdeen ciyaarahu;